



**Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda  
Puntland ee Soomaaliya**



**WARBIXIN  
SANADEEDKA 5AAD**


**2020**





Bulsho sharafteeda uu dhawro sharcigu, qof kastana og yahay xuquuqdiisa

## HIIGSI



In la xaqiijiyo, la ilaaliyo lana ixtiraamo xuquuqda qof kasta oo ku nool Puntland

## HIMILO



## QIYAMKA XAFIISKA

- Madax-bannaani & Daahfurnaan
- Run & Caddaalad
- Wadajir & Midnimo
- Isbedel Horumarineed
- Is-dheelitir & Is-kaashi

## HAL-KU-DHIGEENA

Raadinta Runta waa Helidda Caddaaladda iyo Xuquuqda Aadanaha



# Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland Ee Soomaaliya

**Mudane, Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Dawladda Puntland**

**Garowe, Puntland - Soomaaliya**

**Warqadda Soo Gudbinta Warbixinta Sanadlaha ah ee 2020.**

Mudane Guddoomiye,

Anigoo tixraacaya qodobka 118aad faqradiisa 9aad ee Dastuurka Dawladda Puntland iyo Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland Qodobkiisa 12aad faqradiisa 7aad, waxaa sharaf ii ah in aan halkaan idiinku soo gudbiyo warbixinta 5aad ee XDXAP xilli-warbixineedka Janaayo – Diisember 2020.

**Siciid Cabdi Muumin**

Guddoomiyaha, Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland

**Og:**

- **Guddoomiye-ku-xigeenka labaad ee Golaha Wakiillada Dawladda Puntland**
- **Guddoomiye-ku-xigeenka kowaad ee Golaha wakiillada Dawladda Puntland**
- **Madaxweyne-ku-xigeenka Dawladda Puntland ee Soomaaliya**
- **Madaxweynaha Dawladda Puntland ee Soomaaliya**



# Erey-Bixin

<b>XDXAP:</b>	Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland
<b>RI:</b>	Relief International
<b>SSF:</b>	Somalia Stability Fund
<b>MAP:</b>	Media Association of Puntland
<b>UNDP:</b>	United Nations Development Programme
<b>UNSOM:</b>	United Nations Assistance Mission in Somalia
<b>UNHCR:</b>	United Nations High Commission for Refugees
<b>UNICEF:</b>	United Nations International Children's Emergency Fund
<b>UNOCHA:</b>	United Nations Office for the Coordination of Humanitarian Affairs
<b>PDRC :</b>	Puntland Development and Research Centre
<b>PUNSAA:</b>	Puntland Non-State Actors Association

# EREYGA DIFAACAHA XUQUUQDA AADANAHA DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA



Talooyinka sharci ee xafiisku soo jeediyo waa kuwa ku dhisan dhacdo, baaris iyo xaqiiqooyin cadaynayaa xadgudubyada dhaca. Ilaalinta xuquuqda aadanaha waa raadinta runta oo sal u ah helidda caddaaladda iyo adeeg sharciyeed oo bulshadu ku naalooto



**Siciid Cabdi Muumin**

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland

**B**ismillaahi Raxmaani Raxiim, Illaah ayaa mahad oo dhan leh, Rasuulkeena Maxamed nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaato (Sallaahu Calayhi Wasallam)

Waxaa halkaan lagu soo bandhigay warbixin sanadeedka 5aad ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland (XDXAP), sannadka 2020-ka, warbixintaan oo ah sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 118aad (9) taasoo iftiiminaysa xaaladda guud ee Xuquuqda Aadanaha deegaannada Puntland.

Warbixintu waxay xoogga saaraysaa waxqabadka xafiiska, qorshaha istaratiiyyadda **2018-2020** iyo Qorshe sannadeedka **2020-ka**.<sup>(1)</sup>

Warbixintu waxay si kooban uga hadlaysaa kiisaska tacadiyada, gabood-fallada ka dhacay Puntland, ka jawaab-celinta cabashooyinka, baaritaannada, iyo u qareemidda dadka nugul sida; Dadka Baahiyaha gaarka ah leh, caruurta, haweenka, barakacayaasha, helitaanka iyo hubinta cadaaladda maxaabiista iyo dhibbanayaasha. Sidoo kale, warbixintu waxay xusaysaa caqabadaha la wajahay muddada warbixintan, iyo talooyinka xafiisku u gudbiyey hay'adaha dawladda ee lagu taabagalinaayey Xuquuqda Aadanaha iyo Xorriyaadka Asaasiga ah ee dadka ku nool Puntland.

Warbixintaan waxay si guud u bayaaminaysaa Xaaladda Xuquuqda Aadanaha deegaannada Puntland, iyadoo laga dheehan karo heerka wax qabadka ee Xafiiska iyo guulaha laga gaarey meelihii horey diiradda lagu saaray, laguna muujiyey istaratiiyyadda iyo ujeedooyinka qorshaha saddexda sano ee la soo dhaafay (2018-2020).

Ka dib doorashadii 2aad ee Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland ee Soomaaliya oo loo doortay Mudane Siciid Cabdi Muumin, waxaa dib-u-eegis lagu sameeyey nidaamka hawl-socodsiiinta XDXAP, qaab-dhismeedka maamulka, qiimaynta shaqaalaha, bahwadaagta shaqo, Istraatiiyyadda saddexaad (**2021-2023**) ee XDXAP iyo diyaarinta qorshe-sanadeedka **2021-ka**. Waxaa kaloo dib-u-eegid lagu sameeyey natiijooyinka la gaaray, caqabadaha jira iyo habka lagu wajahayo si looga gudbo caqabadahaas, loona dardar-geliyo waxqabadka XDXAP ee sannadaha soo socda.



Marka la eego habsami u socodka hawlaha iyo barnaamijyada taabagelinta xuquuqda aadanaha iyo helidda adeega caddaaladda, waxaa saamayn weyn ku yeeshay cudurka faafa ee COVID-19. Kaas oo curyaamiyey helidda adeegga waxbarashada, caafimaadka, caddaaladda, isu socodka bulshada iyo xuquuqaha kale ee aasaasiga ah.

Xafiisku wuxuu kaloo soo saaray warbixinno iyo talooyin sharci oo ku saabsan ilaalinta bad-qabka dadka rayidka ah, iyo u qareemidda dhibbanayaasha si looga hortago khataraha ka imaanaya falalka lidka ku ah xuquuqda aadanaha. Talooyinka sharci ee xafiisku soo jeediyo waa kuwa ku dhisan dhacdo, baaris iyo xaqiiqooyin cadaynayaa xadgudubyada dhaca. Ilaalinta xuquuqda aadanaha waa raadinta runta oo sal u ah helidda caddaaladda iyo adeeg sharciyeed oo bulshadu ku naalooto.

Warbixinaha iyo macluumaadka la ururiyey saddexdii sano ee la soo dhaafay waxay muujinayaan, tirada iyo noocyada xad-gudubyada iyo dambiyada ka dhacay Puntland inay kordheen. Arrintaas waxaa loo nisbayn karaa dhalinyaradii oo ay ku soo bateen isticmaalka maandooriyaha, shaqo la'aan iyo baraha bulshada oo sahlay in lagu faafiyo falal anshax xumo ah oo meelo kale laga soo minguuriyey iyo awooddii laamaha caddaaladda oo liita. Laakiin marka dhanka kale laga eego, meelaha laga sameeyey ololaha wacyigelinta bulshada iyo u qareemidda xuquuqda aadanaha waxay keentay in bulshadu codkeeda ku muujiso xadgudubyada dhaca baraha bulshada, saxaafadda, isla markaasna dhibbanayaashu ku dhiiradaan inay cabashadooda soo bandhigaan. iyadoo xogta dhacdooyinka lagu soo gudbiyo aaladaha isgaarsiinta iyo xarumaha taageera dhibbanayaasha xadgudubyada xuquuqda aadanaha. <sup>(2)</sup>

Maadaama, Dawladda Puntland bilawday hanaanka geeddi-socodka doorashooyinka dawladda hoose iyo diiwaangelinta xisbiyada badan, Xafiisku wuxuu hubinayaa xuquuqda ka qaybgalka siyaasadeed ee haweenka, dhalinyarada, dadka la hayb sooco, dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo barakacayaasha, si Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland u guto kaalinta dastuuriga ah ee uu ku leeyahay kor joogtaynta doorashooyinka si loo xaqiijiyo xuquuqda siyaasadeed ee mawaadiniinta Puntland. <sup>(3)</sup>

Faragelinta xukuumada Puntland ee sarifka Shillin Soomaali (Sh.So) iyo Doolarka (USD) ayaa abuuray qalalaase dhaqaale, mudaaharaadyo ay dad badan dhibaato ka soo gaartay, arrintaas oo wali aan loo helin xal. <sup>(4)</sup>

Waxaa kale oo warbixintu muujinaysaa caqabadaha ka jira helidda adeeg loo siman yahay, gaar ahaan bulshada ku nool meelaha laamiga ka fog ama aan lahayn jidadka iyo isgaarsiinta.

Xafiisku wuxuu si gaar ah ugu mahad-celinayaa Hay'adaha Dawliga ah (Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha Wakiillada Puntland, Ciidanka Asluubta Puntland, Hay'adda Forensig Sayniska, PDRC, Laamaha Caddaaladda Puntland), Dalladda Ururada Bulshada ee aan Dawliga ahayn (PUNSAA, Ururka Suxufiyiinta Puntland (MAP) iyo Ururada Qareennada Puntland), Hay'adaha Caalamiga ah (Diakonia Sweden, SSF, RI,), iyo Hay'adaha Quruumaha Midoobay (UNSOM, UNDP, UNICEF, UNHCR & UNOCHA), kuwaas oo qayb muhiim ah ka qaatay barnaamijka taabagalinta xuquuqda aadanaha Puntland.

Gebagebadii, Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland, wuxuu balan-qaadayaa wadashaqayn iyo u heegganaan hawlaha taabagelinta xuquuqda aadanaha iyo difaacidda kuwa u nugul xadgudubyada iyadoo loo marayo shuruucda Puntland iyo kuwa caalamiga ah ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay.

(1) Qodobka 118aad: Awoodaha iyo Xilka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland

(2) Qodobka 42aad: Xaq bandhigidda cabashada

(3) Qodobka 44aad: Doorashooyinka

(4) Qodobka 48aad: Hannaanka Dhaqaalaha

# TUSMO

<b>QAYBTA 1-AAD</b>	<b>12</b>
<b>1.0 AWOODAHA SHARCI IYO TIIRARKA UU KU AASAASAN YAHAY XDXAP</b>	<b>13</b>
1.1. Aasaasidda Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland	13
1.2. Sharciyadda Xafiiska	14
1.3. Ujeedooyinka, Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha:	15
1.4. Mabaadi'da XDXAP	15
1.5. Hiigsiga iyo Himilada XDXAP	15
1.6. Oraahda Yoolka Guud ee Parnaamijka XDXAP	15
<b>QAYBTA 2-AAD</b>	<b>16</b>
<b>2.0 DULMAR XAALADDA XUQUUQDA AADANAHA PUNTLAND</b>	<b>17</b>
2.1 Xaaladda Guud ee Wacyiga Xuquuqda Aadanaha Puntland	17
2.2 Xaaladda Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha	17
2.3 Saamaynta Cudurka Koroonaha	18
2.4 Xiriirka ka dhexeeya ilaalinta Deegaanka iyo Xuquuqda Aadanaha	18
2.5 Xorriyadda Fikirka iyo Saxaafadda	19
2.6 Korjoogteynta Doorashooyinka	24
2.7 Adeegyada Aasaasiga ah ee Bulshada	26
<b>QAYBTA 3-AAD</b>	<b>27</b>
<b>3.0 AWOOD-DHISIDDA IYO WADA SHAQAYNTA BAHWADAAGTA XDXAP</b>	<b>28</b>
3.1 Korjoogtaynta iyo dib u eegista barnaamijyada XDXAP	28
3.2 Waxqabadka XDXAP	28

3.3 Fidinta adeegga xafiiska ee degaannada cusub	29
3.4 Dhisidda Awoodda iyo Mugga Waxqabadka XDXA Puntland	29
3.5 Agabka Xafiisyada	31
3.6 Isku Xirka Bahwadaagta iyo Daneeyayaasha Xuquuqda Aadanaha Puntland	32
3.7 Wadaagista iyo Maareynta Xogta	35
<b>QAYBTA 4-AAD</b>	<b>37</b>
<b>4.0 WACYIGELINTA, U QAREEMIDDA &amp; TAABAGELINTA XUQUUQDA AADANAHA</b>	<b>37</b>
4.1 Wacyigelinta	38
4.2 Taabagelinta iyo u Qareemidda Xuquuqda Aadanaha	42
<b>QAYBTA 5-AAD</b>	<b>48</b>
<b>5.0 KORJOOGTAYNTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA AADANAHA</b>	<b>48</b>
5.1 Kormeerka iyo Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha	49
5.2 Dhacdooyinka iyo Tacadiyadda ee ka dhanka ah Haweenka iyo Caruurta	50
5.3 Maaraynta kiisaska iyo cabashooyinka	53
5.4 Kor-u-qaadidda dhawrista Xuquuqda Aadanaha iyadoo loo marayo Maamulka iyo Adeegyada Caddaaladda	54
5.5 U Qareemidda Dhibbanayaasha Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha	55
5.6 Kormeeradda iyo Qiimaynta Meelaha u Nugul Xadgudubyada	55
5.7 Xoojinta dhaqangelinta xeerarka iyo heerbeegyada ilaalinta Xuquuqda Aadanaha	61
<b>QAYBTA 6-AAD</b>	<b>63</b>
<b>6.0 CAQABADAHHA IYO TALOONYINKA</b>	<b>63</b>
6.1 Caqabadaha jira	63
6.2 Talooyinka	64

# NUXURKA WARBIXINTA OO KOOBAN

Waxaa halkaan lagu soo bandhigay warbixin sanadeedka 5aad ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland (XDXAP), 2020-ka. Warbixintu waxay soo koobaysaa soo bandhigidda xaaladda guud ee xuquuqda aadanaha Puntland, waxyaabaha u qabsoomay xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland iyadoo laga duulayo qorsha sanadeedka 2020-kii, caqabadaha lala kulmay iyo talo bixin ku saabsan horu-socodsiiinta hawlaha dhawrista iyo taabagelinta xuquuqda aadanaha Puntland.

## Warbixintu waxay u qaybsantaa 6 qaybood:

- **Qaybta Kowaad:** awoodda sharcieed iyo mabaadi'da, ujeedooyinka, hiigsiga iyo himilooyinka uu ku aasaasan yahay xafiisku iyo mas'uuliyadaha loo igmaday.
- **Qaybta Labaad:** Dulmar xaaladda xuquuqda aadanaha Puntland, xadgudubyada dhaca, xaaladda Cudurka Koroonaha, xiriirka ka dhexeeya xuquuqda aadanaha iyo deegaanada, xaaladaha xorriyada hadal iyo xuquuqda doorashooyinka.
- **Qaybta Saddexaad:** awoodsiinta mugga waxqabad ee xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha iyo horumarinta iskaashiga wada-shaqaynta bahwadaagta iyo wadaagista xogta.
- **Qaybta Afraad:** Wacyigelinta iyo u qareemidda xuquuqda aadanaha
- **Qaybta Shanaad:** Kor u qaadidda illaalinta iyo dhawrista Xuquuqda Aadanaha iyadoo loo marayo Maamulka iyo adeegyada Caddaaladda
- **Qaybta Lixaad:** Caqabadaha jira iyo talo soo jeedin ku aaddan xallinta caqabadahaas.

Warbixintan waxay ku salaysan tahay wixii ka qabsoomay mudnaanaha ka yimid qorshaha istiraatiijiyada 2018 – 2020 iyo qorshe sanadeedka 2020 ee XDXAP.

## Mudnaanahaas waxaa ka mid ah;

- **Dhisidda awoodda iyo mugga waxqabadka XDXA Puntland iyo Horumarinta xiriirka Bahwadaagta Xuquuqda Aadanaha**
  - 1.1. Awood-dhisidda Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha
  - 1.2. Isku xirka bahwadaagta iyo daneeyayaasha xuquuqda aadanaha Puntland
  - 1.3. Wadaagistaxogta, warbixinaha, dhacdooyinka iyo guud xaaladaha XA.
- **Horumarinta iyo taabagelinta u qareemidda iyo wacyigelinta Xuquuqda Aadanaha**
  - 2.1. Wacyigelinta dadweynaha arrimaha xuquuqda aadanaha.
  - 2.2. Horumarinta iyo taabagelinta u qareemidda Xuquuqda Aadanaha
- **Kor u qaadidda illaalinta iyo dhawrista Xuquuqda Aadanaha iyadoo loo marayo Maamulka iyo adeegyada Caddaaladda**



3.1. Ilaalinta iyo difaacidda xuquuqda aadanaha Puntland 3.2. Korjoogtaynta helidda sharciga iyo caddaaladda, gaar ahaan bulshada qaybaheeda u nugul xadgudubyada ay ka mid yihiin; carruurta, haweenka, dadka la takooro, dadka laga tiro badan yahay, barakacayaasha iyo qaxootiga.

3.3. Xoojinta iyo hubinta dhaqangelinta xeerarka xuquuqda aadanaha ee ay Soomaaliya saxiixday

Inkastoo ay jireen caqabado uu ka mid yahay faafitaanka cudurka Koroonaha, Xafiisku isagoo ka mira-dhalinaya yoolka guud iyo mudnaanaha barnaamijka waxqabad, wuxuu ku guulaystay sanadka 2020-ka arrimaha soo socda:-

- Waxaa la hirgeliyey dibu habaynta shaqaalaha iyo hanaanka shaqada si loo horumariyo awoodda waxqabad ee Xafiiska ilaa 57%. Waxaa kor loo qaaday, lana baahiyey awoodda waxqabad ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland iyo shaqaalaha, taas oo keentay in Xafiisku u guto hawlaha loo igmaday si mug leh
- Waxaa lagu guulaystay baahinta korjoogtaynta iyo qiimaynta barnaamijyada shaqo ee xafiiska iyadoo la gaarayo bulshada laamiga ka fog ilaa 34%.
- Waxaa laga shaqaysiiyey aaladaha xogta lagu wadaago ee internetka iyo adeegsiga xiriirka bahwadaagta xuquuqda aadanaha, iyo isuduwidaha hay'adaha ka shaqeeya xuquuqda aadanaha, iyadoo la ilaalinayo caqabadaha saamaynta cudurka koroonaha
- Waxaa kor loo qaaday heerka wacyigelinta iyo ogaanshaha xuquuqda aadanaha ee dadweynaha, hay'adaha dawliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay ilaa 40%, iyadoo la adeegsanayo hanaanka hawl-socodsiiinta taabagelinta iyo u qareemida xuquuqda aadanaha, taas oo keentay in dadku dareemaan hab-dhaqanka wanaagsan ee xuquuqda aadanaha, xorriyadda hadalka, nabadaynta, hannaanka dimuqraadiyaynta iyo kawada qaybgalka bulshada.
- Waxaa hoos u dhacay xadgudubyada iyo tacaddiyada meelaha laga sameeyey wacyigelinta. Taas oo ay sabab u tahay dadaalka la geliyey hanaanka korjoogtaynta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha, helidda hanaan caddaaladeed, xushmaynta sarraynta sharciga iyo ka xoroobidda faquuqa oo xafiisku door muuqda ka qaatay.
- Waxaa kordhay warbixinaha kiisaska xadgudubyada ee laga helayo meelaha fogfog ilaa 20%, iyadoo dhibbanayaashu ku dhiiradeen inay u soo gudbiyaan warbixintooda XDXAP iyo hay'adaha kale ee gacan siiya difaacidda xuquuqda aadanaha.
- Xafiisku wuxuu xoojiyey dhaqan-gelinta halbeegyada iyo xeerarka xuquuqda aadanaha, wuxuuna ku boorriyey Xilleyska (duty-bearers) dhawrista heer-beegyada xuquuqda aadanaha iyo mabaadi'da iyo Xaqleyda (rights-claimers) oo xog ogaal u noqday muhiimada ka qaybgalka hanaanka xuquuqda doorashooyinka.



**Sawir 1.**

Kulan Kormeer iyo Isbarasho oo Difaacaha XA cusub uu la yeeshay Wakiilo ka socda Wasaaradda Cadaaladda, Madaxtooyadda, Hanti Dhowrka guud, Guddiga Doorashooyinka, Maamul Wanaaga, Maxkamada Sare iyo Bulshadda Rayidka. [ 28 Luulyo 2020 ]

# QAYBTA 1-AAD

# 1.0 AWOODAHA SHARCI IYO TIIRARKA UU KU AASAASAN YAHAY XDXAP

## 1.1. Aasaasidda Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland

Difaacaha Xuquuda Aadanaha Puntland Waxaa La Daahfuray Bishii Maarso 2015 Iyadoo La Tixraacayo Qodobada 116aad, 117aad Ee Dastuurka Dawlada Puntland Iyo Qodobada 2aad Iyo 6aad Ee Sharciga Difaacaha Xuquuda Aadanaha Iyo Sharcigiga Caalamiga Ee Mabaadiida (Paris Principles).

Shaqada Xafiiska Difaacaha Xuquuda Aadanaha ayaa ah in uu xaqiijiyo in muwaadiniinta helaan dhammaan xuquuqaha dastuuriga ah iyo kuwa sharciga ah, iyadoo xafiisku u maraayo ilaalinta, taabagelinta iyo u qareemida xuquuqda aadanaha Puntland. Haddaba, sida ku cad warqadda summaddeedu tahay XGGW/DPL/124/2014, kuna taariikhaysan 01/12/2014 ee ka soo baxday Xafiiska Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Puntland ujeedkeedkeeduna ahayd doorashada Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland ee dhacday 27-dii Nofember 2014 ayaa loo doortay Maxamed Yuusuf Cali guddoomiyihii ugu horeeyey ee XDXAP muddo shan sano ah Nofember 2014 – Nofember 2019.

Waxaa doorashada 2aad la qabtay 19kii bishii Luulyo 2020, Waxaana guddoomiyaha XDXAP loo doortay Siciid Cabdi Muumin, sida ku cad warqadda summaddeedu tahay XGGW/DPL/75/2020, kuna taariikhaysan 23/07/2020 ee ka soo baxday Xafiiska Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Dawladda Puntland ujeedkeedkeeduna ahayd soo gudbin natiijada doorashada Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland. Tan iyo inta la yagleelay Xafiisku wuxuu ku guulaystay u qareemidda dhibbanayaal badan oo loo fidiyey gargaar sharci iyo mid aadaminimo, sidaas oo kale, wuxuu tababar aqoon kororsi siiyey Ciidanka Xabsiyada, Booliiska Iyo Shaqaalaha Garsoorka Puntland si kor loogu qaado wacyigooda, Aqoontooda Iyo Xirfadahooda ee xagga ilaalinta Xuquuqda Aadanaha.



Sawir 2.

19 Luulyo 2020, Golaha Wakiilada DPL ayaa cod aqlabiyad ah ku doortay Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland, Mudane: Siciid Cabdi Muumin.

## 1.2. Sharciyadda Xafiiska

XDXAP waa hay'ad dawli ah oo madaxbanaan, lehna awood dastuuri ah iyo xeer u gaar ah sida ay tilmaamayaan qodobada dastuurka, xeerarka kale ee Puntland iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya saxiiday.

- **Dastuurka:** Xafiiska sharciyaddiisu waxay ku caddahay qodobadan soo socda ee dastuurka **Puntland:- Qodobka 116aad:** Hay'adda Difaacaha iyo Taabbagelinta Xuquuqda Aadanaha (Qeexid) Qodobka 117aad: Magacaabidda Difaacaha Qodobka 118aad: Awoodaha iyo Xilalka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Qodobka 119aad: Xil Ka Qaadista Difaacaha Xuquuqda Aadanaha
- Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland Sida ku cad sharci Lr. 11 ee xeerka difaacaha xuquuqda aadanaha oo ka kooban 21 qodob, Xafiisku wuxuu leeyahay mas'uuliyado iyo awooddo uu ku fuliyo korjoogtaynta, dhawrista, ilaalinta iyo taabagelinta xuquuqda aadanaha Puntland. Mas'uuliyadahaas iyo shaqooyinkaas waxaa ka mid ah:-
  - Ka hortegidda xadgudubyada xuquuqda aadanaha, isagoo talo-bixin siinaya hay'ada ha wadaniga ah ee ay arrintu khuseyso.
  - Ku wacyigelinta dadweynaha iyo mas'uuliyiinta dawladda muhiimada ay leedahay dhaw rista iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha ee ku cad dastuurka iyo shuruucda Puntland iyo qa waaniinta/heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya saxiixday. Difaacida xeerarka iyo shuruucda dastuurku qeexayo.
  - Baarista cabashooyinka ay muwaadiniinta ama ururada bulshadu ka shee ganayaan xuquuqdooda aadamanimo in lagu xadgudbay, isla markaasna uu gaarsiiyo natiijada baaris ta ka soo baxda hay'adaha dawlaga ah iyo kuwa wadaniga ah, isagoo raac inaya talo soo jeedintiisa la xiriirta damaanad qaadka xuquuqda aadanaha
  - Taageeridda dhibbanayaasha xadgudubyada xuquuqda aadanaha, lagana difaaco max kamadaha hortooda ama si guud.
  - Magcaabidda guddiyo gaar ah oo gacan ka siiya gudashada xilka difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland
  - Kormeeridda goob kasta oo lagu sameeyo ama u nugul gabood-falka xuquuqda aadanaha U ololaynta dib u habaynta sharciyadda iyo hab-dhaqanka maamulka si kor loogu qaado dhawrista iyo qaddarinta xuquuqda aadanaha
  - Soo saarista warbixin sanadeed la xiriira xaalada xuquuqda aadanaha ee Puntland U ban dhiggidda golaha xukuumadda talooyinka ku aaddan mashruuc sharci oo khu seeya xuquuqda aadanaha
  - Gudashada xilalka kale ee sharciyadda Puntland siiyeen xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha



### 1.3. Ujeedooyinka, Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha:

**Qodobka 11aad ee Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha wuxuu qorayaa Ujeeddooyinka loo aasaasay Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha:**

- Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha iyo Wakiilladiisa Gobollada, waxaa loo dhisay dhowrista xuquuqda aadanaha iyo ilaalinta xoriyaadka aasaasiga muwaadiniinta iyo dhammaan dadka ku nool Puntland sida ku cad Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Puntland.
- Xafiisku wuxuu mas'uul ka yahay dhawrista iyo taaba gelinta xuquuqda aadanaha
- Xafiisku wuxuu korjoogteeyaa, kana warbixiyaa xaaladaha guud ee dhammaan hawlaha la xiriira xadgudubyada, gaboofallada iyo tacadiyada laga galo xorriyaadka iyo xuquuqda aadanaha.
- Xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha wuxuu u qareemaa, ilaaliyaa, difaacaana dadka u nugul xadgudubyada xuquuqda aadanaha.
- Wuxuu baaritaano ku sameeyaa, kana jawaabaa cabashooyinka, natiijada baaristana wuxuu u gudbinayaa hay'adaha ay khusayso, iyadoo natiijada warbixinta iyo xalkeedaba loo marayo hay'adaha Dawladda sida ay u kala sarreeyaan.

### 1.4. Mabaadi'da XDXAP

Mabaadi'da Xafiiska Waxaa ka mid ah; Madaxbannaani iyo u Hogaansanaan Sharci, Aqoon Xirfadeed, Daahfurnaani, Isla Xisaabtan, Dhexdhexaadnimo Iyo Eex La'aan, Caddaalad Iyo Sinaan, Iyo Adeeg Gaarsiinta Sharci ee Bulshada.

### 1.5. Hiigsiga iyo Himilada XDXAP

Hiigsiga xafiisku waa "bulsho sharafteeda uu dhawro sharciga, qof kastana og yahay/tahay xuquuqdiisa/xuquuqdeeda". Himilada xafiisku waa "in la xaqiijiyo ixtiraamka iyo ilaalinta xuquuqda aadaminimo ee qof walba oo ku nool Puntland".

### 1.6. Oraahda Yoolka Guud ee Parnaamijka XDXAP

Oraahda yoolka guud ee qorshaha istiraatiijiyadda 2018 – 2020 wuxuu xoojinayaa wax-ku-oolnimada iyo madax-banaanida hay'adeed ee sare u qaaddida iyo dhawrista heer-beegyada iyo hannaanka lagu ilaalinayo xuquuqda aadanaha heer shaqsiyeed, bulsho iyo dawlad intaba. Tani waxay abuuraysaa jawi awood siinaya sarraynta sharciga iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha. Si loo hirgeliyo yoolka guud ee XDXAP, waxaa xoogga la saaray dib u habaynta nidaamyada maamul, isla xisaabtanka, korjoogtaynta iyo qiimaynta barnaamijyada si loo aburo jawi lagu horumarin karo waxqabadka xafiiska, laguna taabagelin karo u qareemista iyo dhawrista xuquuqda aadanaha. Arrintaas oo lagu gaari karo adeeg caddaaladeed oo loo siman yahay, dadkuna ku naaloodaan xuquuqdooda iyo madax-baanidooda, iyadoo la raacayo hannaan wadatashi waafaqsan shareecada islaamka iyo xeerarka dalka.



**Sawir 3.**

Hubinta Xaaladda Xuquuqda Maxaabiista ku xiran Xabsiga Gaalkacyo.

# QAYBTA 2-AAD



## 2.0 DULMAR XAALADDA XUQUUQDA AADANAHA PUNTLAND

### 2.1 Xaaladda Guud ee Wacyiga Xuquuqda Aadanaha Puntland

Xaaladda Xuquuqda Aadanaha Puntland waa mid aad u hoosaysa markii laga eego awoodda hay'adaha garsoorka iyo fulinta sharciga. Hay'adaha korjoogtaynta xuquuqda aadanaha ee madaxa banaan oo XDXAP ka mid yahay, waxaa soo foodsaara culaysyo siyaasadeed iyo kuwo dhaqaale. Taas oo wax u dhinta heerka isla xisaabtanka iyo is-dheelitirka caddaaladdeed. Haddaba, si arrimahaas wax looga qabto, Xafiisku wuxuu daraasad ku sameeyey gobolada iyo degmooyinka Puntland ee la gaarsiiyey wacyigelinta iyo u qareemidda xuquuqda aadanaha isbedelada ku yimi. Halkaas waxaa ka soo baxay in meelaha wacyigelinta laga sameeyey ay ku yaraadeen xadgudubyada iyo fal-dembiyeedyada. Hase yeeshee, weli ay hoosayso adeegga caddaalada. Gaar ahaan meelaha laamiga ka fog.

Korjoogtaynta iyo baarista xadgudubyada xuquuqda aadanaha, wacyigelinta dadweynaha iyo u qareemidda dhibbanayaasha waa mas'uuliyado culus oo u baahan in dhaqaale iyo awood joogto ah la geliyo. Haddii aan awood iyo dhaqaale joogto ah loo qoondayn, waxaa adkaanaysa in la helo warbixino iyo xogo madax-banaan oo lagu ilaalin karo xuquuqda aadanaha Puntland. Xafiisku wuxuu xoog saaray gacansiinta dadka xad-gudubyada u nugul oo ay ka mid yihiin; haweenka, carruurta, barakacayaasha, dadka baahiyaha gaarka ah leh, muhaajiriinta iyo dadka la hayb-sooco, iyadoo xafiisku booqasho joogto ah ku sameeyo meelaha xad-gudubyada u nugul ee ay ka mid yihiin; xabsiyada, saldhigyada booliiska, maxkamadaha, xerooyinka barakacayaasha, xafiisyada xeer ilaalinta iyo hay'adaha kale ee adeegga bixiya. Xafiisku wuxuu kaloo wada shaqayn dhow la lee yeeyahay Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha Wakiillada Puntland.

### 2.2 Xaaladda Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha

Warbixintu waxay si guud u muujinaysaa saddexdii sano ee la soo dhaafay inay kordheen tirada iyo noocyada xadgudubyada iyo tacaddiyada ka dhan ah xuquuqda aadanaha guud ahaan Puntland. Arrintaas waxaa loo nisbayn karaa tirada degmooyinka iyo tuulooyinka xafiisku gaaray oo kordhay. Taasina ay keentay in dad badan oo dhibbanayaal ah inay warbixintooda u soo gudbiyaan XDXAP iyo xarumaha kale ee adeegyada bixiya. Hase yeeshee, markii la eego degmooyinkii wacyigelinta horey looga sameeyey waxaa hoos u dhacay tirada xadgudubyada iyo dembiyada. Arrintaas waxaa loo aanayn karaa wacyigelinta iyo u qareemidda xuquuqda aadanaha. Ololaha wacyigelinta bulshada iyo u qareemidda xuquuqda aadanaha waxay keentay in bulshadu codkeeda ku muujiso xadgudubyada dhaca, isla markaasna dhibbanayaashu ku dhiiradaan inay cabashadoodu soo bandhigaan. Warbixinada dhacdooyinka lagu soo gudbiyo aaladaha isgaarsiinta waa kordheen.



Warbixinaha korjoogtaynta iyo baarista xadgudubyada xuquuqda aadanaha waxay muujinayaan inay badanaa geystaan dhalinyaro ragga ah. Waxyaabaha dhalinyarada u sahla gelista xadgudubyada waxaa ka mid ah isticmaalka maandooriyaha, shaqo la'aan, sicir barar iyo baraha bulshada oo sahlay in lagu faafiyo falal anshax xumo ah oo meelo kale laga soo minguuriyey iyo awooddii laamaha caddaaladda oo liita. Dadka aad ugu nugul xadgudubyada sida: Caruurta, dadka naafada ah, barakacayaasha, qaxootiga iyo dadka la hayb-sooco ayaa ah kuwa badanaa ay ku dhacaan tacadiyada xuquuqda aadanaha ka dhanka ah.

### 2.3 Saamaynta Cudurka Koroonaha

Sannadka 2020 waxaa dhammaan shaqooyinkii caqabad ku noqday caabuqa COVID-19. Hadaba, Xafiisku isagoo ka duulaaya Xuquuqaha asaasiga ah ee bulshada kuna xusan shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka kale ee dalka u yaal wuxuu waday intii sannadkaan ahayd wacyigelin iyo qiimayn ku saabsan ka hortagga Xanuunka COVID-19, Xafiisku wuxuu qaybiyey agab ka hortagga cudurka koroonka maadaama adeegga caafimaadku ka midyahay xuquuqaha asaasiga ee bulshadeena dastuurku siiyey. Xafiisku wuxuu sameeyey ololaha wacyigelin, shirar iyo tababaro/ seminaaro la xiriira COVID-19 u qabtay bulshada qaybaheeda nugul sida dadka naafada ka ah araga iyo maqalka, iyadoo la adeegsanayo saxaafadda (raadiyaha iyo TV-yada) la heli karo.

### 2.4 Xiriirka ka dhexeeya ilaalinta Deegaanka iyo Xuquuqda Aadanaha

Ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo deegaanka ay ku nool yihiin waa xuquuq caalami ah sida ku cad Baaqa Caalamiga ah ee 1992 kuna saabsan Deegaanka iyo Horumarinta. Isbedelka cimilada iyo faafitaanka wasakhawga deegaanka waa arrin si toos ah saamayn ugu leh aasaasiyaadka nolosha aadamiga sida; badbaadada, nadaafadda, caafimaadka, biyaha, cuntada iyo waaritaanka deegaanka. Deegaameynta soo badaneysa, Xaalufiinta Deegaanka, Jarista Dhirta, Bixinta Jidad sharci daro ah iyo Ciribtirka Duur Joogta waxay baabi'iniyaan Hab-nolodeedka iyo Hab-dhaqanka Deegaanka taas oo sababta iska-horimaadyo iyo khilaafaad saameyn taban ku yeelanaya Nolosha iyo Jiritaanka Bulshada. Sidaa daraadeed waa in la daryeelo lagana ilaaliyo Khayraadka Deegaanka Dabiiciga wax kasta oo waxyeelo u gaysanaya.



**Sawir 4.** Burburinta Deegaanka iyo Xaalufinta Daaqa

## 2.5 Xorriyadda Fikirka iyo Saxaafadda

Xafiisku wuxuu qabtay cabashooyin iyo tacaddiyo ka dhan ah xorriyada hadalka, warbaahinta iyo saxaafadda madaxa banaan, sida; xarigga, xakamaynta galaangalka wararka iyo handadaad ay suxufiyiintu marmar la kulmaan. sida ka muuqata shaxahan hoose:-

### Shaxda 1. Tacadiyada ka dhanka ah Suxufiyiinta

Tr	Tariikh	Magaca qofka	Goobta	Tacadiga	Cidda geysatay	Faallo kooban
	20/2/2020	Codka Nabadda & madax-bannaan	Galkacyo	Xarig	Booliska Galkacyo	Agaasimaha Idaacadda Codka Nabadda ee Gaalkacyo Axmed Caano-geel iyo Siciid Nadaar oo isna ah suxufi madax-bannaan ayaa Boolisku xireen saacado kooban oo ka mid ah 20/2/2020, labada suxufi oo xarigooda ka hadlay markii la sii daayay waxay sheegeen inuu ahaa caburin iyo xarig sharci daro ah. Boolisku kama aysan hadlin sababta xariga weriyayaashan.



26/5/2020	Madax-bannaan	Garowe	Xarig	Booliska	Cabdiqani Fantastic – weriyahan wuxuu cod ka duubay dad isugu jira qaybaha bulshada oo aragti ka dhiibanayay khilaafka madaxweynaha iyo ku xigeenka. Laakiin galabtii markii uu magaalada ku soo noqday waxaa xiray booliska in kastoo markii dambe ay sii daayeen ciidamada madaxweyne ku xigeenku.
6/9/2020	Radio Daljir	Garowe	Xarig	Maxkamadda D-1aad Garowe	Khadar Cawl iyo Cabdiqani fantastic oo ka tirsan Raadiyo Daljir ayaa gudoomiyaha maxkamadda Darajada koowaad amray in la xiro iyagoo markaas maxkamadda u tegay hawl shaqo oo ay rabeen in ay waraysi ku weydiistaan gudoomiyaha qudhiisa. Ma jirin wax laga ogyahay eedayntooda. Waxaa xusid mudan in isla markiiba loo jaray warqad xabsi xalaalayn ah oo lagu geeyay xabsiga dhexe ee Garowe, ugu dambaynna damiin ayaa lagu sii daayay.
28/12/2020	Kilwe media	Garowe	Xarig	PISA	Kilwe Adan oo kamid ahaa wariyaasha ka howlgala magaalada Garowe ayaa waxaa gurigiisa kala baxay ciidanka nabadsugida waxay xirayna ku xireen meel aan la aqoon 15 shan iyo toban cisho ah kadib waxaa warqad ka soo saaray Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha isagoo ku tilmaamay xarigaas mid aan sharciga waafaqsanayn.
28/12/2020	Radio Garowe	Garowe	Xarig	PISA	Faarax khalif yamani kamid ahaa wariyaasha ka howlgala magaalada Garowe ayaa waxaa gurigiisa kala baxay ciidanka nabadsugida waxay ku xireen meel aan la aqoon balse dhowr maalin kadib ayaa lasii daayey isagoo aan waxba lagu soo eedayn.



	25/02/2020	Codka Nabada	Gaalkacyo	Xarig	Booliska	Axmed Maxamed Cali, Codka Nabada C/weli Jaamac Xasan SBC iyo Siciid C/laahi kulme, wariye madax-banaan wariyaashan ayaa Galkacyo lagu xiray xilli ay baahinayeen banana bax shacabka gaalkacyo.
--	------------	--------------	-----------	-------	----------	---

**Shaxda 2. Xaqa saxaafadda iyo xakamaynta Warbaahinta**

Tr	Taariikhda	Magaca Xaruunta	Goobta	Dhacdada	Cidda geysatay	Faallo kooban
	17/1/2020	Baraha Bulshada	Garowe	Xarig	Booliska	Wuxuu aragti aruurin muuqaal ah ka sameeyay Bulshada Garowe taas oo ku aadanayd booqasha madaxweyne Axmed Madoobe ee Bosaso 16/1/2020.
	30/3/2020	SBC	Garowe	Handadaad iyo hanjabaad	Taliye ku xigeenka Madaxtooyada	Iyadoo la joogo aaskii gudoomiyaha gobolka Nugaal ayaa ciidamada madaxtooyadu si gaar ah u bar-tilmaameedsadeen weriyahan. Taliyaha ku xigeenka madaxtooyadda oo hadda ah taliyaha ayaa ugu hanjabay inuu Bam ku dili doono, sababtuna waxay ahayd warbixinno uu hore uga sii daayay oo uu taliyuhu u arkayay in ay dhib ku yihiin Dawladda.
	19/09/2020	Universal TV	Garowe	Handadaad, xakamayn xog, iyo Jirdil	Ciidanka Dawladda Hoose ee Garowe	Jaamac Ciise Maxamuud Oog oo ka tirsan TV-ga Universal oo dad shacab ah ka duubayay cabasho ay ka muujinayeen dhul ay deganaayeen oo laga kiciyay, canshuur dheeraad ah iyo sicir barar ayaa ciidanku u diideen inuu duubo xogtaas. Taliye ku xigeenka ciidanka Dawladda hoose Axmed Sooyaal wuxuu weriyaha madaxa kaga dhufatay ul dhengad ah, ciidankuna waxay ku sameeyeen tuur-tuurid isaga iyo qalabkiisa.



8/1/2020	Radio Daljir	Garowe	Eedayn iyo Digniin	Madaxweynaha	Radio Daljir waxay baahiyeen in madaxweynuhu eedayay xili uu qabanayay shir jaraa'id oo uu kaga hadlayay sannad-guuradiisii kowaad. Weriye ka tirsan raadiyaha ayaa madaxweynaha weydiiyay su'aal la xiriirta xorriyadda hadalka, laakiin madaxweynuhu wuxuu sheegay in Daljir ay ka mid tahay warbaahin samaysa been abuur oo uu u digayo, arag muuqaalka lifaaqan <a href="https://youtu.be/RUPDVDxn80U">https://youtu.be/RUPDVDxn80U</a>
----------	--------------	--------	--------------------	--------------	---

**Shaxda 3. Xorriyadda fikirka, Xaqa Asaasidda ee ka mid noqoshada ururada Bulshada iyo Xaqa Bannaan-baxa tacadiyadda ka dhanka ah suxifiyiinta**

Tr	Taariikhda	Magaca qofka	Goobta	Tacadiga	Ciday Geysatay	Faallo kooban	
	26/5/2020	Yasir Ahmed Mohamed		Qardho, Karkaar	Xarig, caga-juglayn iyo Bahdil	Booliska Karkaar	Wuxuu qoraalo ku sameeyaa baraha Bulshadda. Ciidanka Booliska Qardho ayaa u yeeray way xireen, dabadeedna taliyaha iyo dhawr sarkaal oo kale ayaa qol gaar ah la galay oo u gacan qaaday, wuxuu sheegay inuu khadka ku jira taliyaha ciidanka madaxtooyadda oo saraakiisha isaga handadaysay amar ka qaadanayeen. Waxay siiyeen digniin ah inuusan waxa isaga iyo Booliska dhex-maray uusan sheegin cidna iyo in uusan mar dambe ka hadli karin arrimaha Dawladda isagoo Qardho jooga.



6/6/2020	Gabdho cawaynaaya	Qardho, Karkaar	Xarig iyo muuqaalo la baahiyay		Taliyaha saldhiga Booliska Qardho iyo taliye ku xigeenka qaybta booliska gobolka Karkaar ayaa qabtay isla markaasna muuqaalo ka duubay koox gabdho ah oo dab-shitay isla markaasna cawaysin ku samaysanaya meel duleedka magaalada Qardho ah, waxaa gabdhaha wehliyay wiil kuray ah oo la sheegay inuu dhimirka ka xannuunsanaa. Boolisku waxay ku gabdhahan ku sameeyeen fadeexayn iyo in ay muuqaalo ka duubeen kuna baahiyeen baraha bulshada.
22/8/2020	Ruun Cabdi Cali	Qardho, Karkaar	Xarig	Taliyaha saldhiga Booliska Qardho	Ruun Cabdi waxaa xiray booliska iyadoo markii dambe lagu sii daayay damaanad. Xarigeeda oo aan si dhab ah loo xaqiijisin sababtiisa balse boolisku sheegeen inuu salka ku hayay sawirro iyo qoraalo ay ku daabacday baraha bulshada oo ka dhan ah hab-maamulka booliska ayaa qabsaday baraha bulshada iyo warbaahinta tooska ah.
29/07/2020	Mudaharaadayaal a	Garowe	Dhawac	Booliska Garowe	Waxaa rasaas lagu furay dad ka muda haraadaayey cashuur lagu kordhiyey ganacsiga waxaana lagu dhaawacay 3 gabdhood.

26/12/2020	Nadiiro Faysal shire	Garowe	Dil	Booliska Garowe	Nadiiro Faysal shire waxay ku dhaawacantay raras ay boolisk ku fureen dad banana baxayaal ah oo kacabanayey sicir bararka iyo shilin soomaaliga la diiday.
23/07/2020	Wilal Cawaynaayey	Dhahar	Dil iyo dhaawac	Booliska dhahar	Waxaa booliiska dhahar ku fureen raras wiilal ku cawaynaayey meel magaalada dhahar banaankeed ah, rasaastii booliska ku fureen waxaa ku dhintay hal wiil midkalena waa ku dhaawacmay.



**Sawir 5.**

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland oo ay Weheliyaan Gudoomiyaha Ururka suxufiyiinta (MAP) iyo gudoomiyaha ururrada bulshada rayidka ah (PUNSAA) ayaa siwadajir ah maxaabiis suxufiyiin ah ugu booqday xabsiga dhexe ee garowe kuwaa soo dib u helay xorriya dooda.

## 2.6 Korjoogteynta Doorashooyinka

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo ka qayb galay kulan lagu guddoonsiinayay Ururada Siyasadda Puntland shahadooyin aqoonsi oo ay kasoo qayba galeen bulshada qaybaheeda kala duwan, kulanka oo ay soo qaabanqaabiyeen Guddiga Kumeel Gaarka ah ee doorashooyinka Puntland (GKDPL)



**Sawir 6.** Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo ka qayb galay kulan lagu guddoonsiinayay shaha dooyin a qoonsi Ururada siyaasadda ee Puntland.

Xafiisku wuxuu korjoogteeyey doorashooyinka Golayaasha deegaanka degmooyinka (Rako-raxo, Galdogob, Bargaal iyo Gumbax) kuwaas oo tiradooda guud tahay 98 Mudane, Rag 75 (76.5%), Haween 23 (23.5%)

**Shaxda 4. Korjoogteenta doorashooyinka Golayaasha deegaanka degmooyinka**

Tr	Xubnaha Golaha Deegaanka	Xubnaha	Haween	Rag
	Galdogob	27	4	23
	Rako	27	9	18
	Bargaal	27	7	20
	Gumbax	17	3	14
		98	23 ( 23.5% )	75 ( 76.5% )



**Sawir 7.** Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo korjoogteynaya Doorashadda Go la ha Deegaanka ee D egmadda Galdogob

**Sawir 8.**

Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo korjoogteynaya Doorashada Golaha Deegaanka ee Degmada Rako

## 2.7 Adeegyada Aasaasiga ah ee Bulshada

Warbixinnada ka imaanaya hawl-wadeenada iyo wakiillada gobolada ee XDXAP waxay muujinayaan dadka ku nool meelaha laamiga ka fog inay ugu hooseeyaan helitaanka adeegyada aasaasiga ah, sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, kaabayaasha dhaqaalaha gaar ahaan jidadka, ka qaybgalka fursadaha horumarinta iyo mashaariicda. Cabashooyinka ka yimaada deegaanadaas waxay u badan yihiin haweenka oo ku umul raaca xilliga foosha iyadoo ay sababsadaan adeeg caafimaad la'aan iyo nafaqa-darro muddo dheer soo jirtay. Maadaama aanay jirin qalab iyo xirfadlayaal sare oo caafimaad, waxaa hooyada foosha ku dheeraato ama ku adkaato u dhimitaa gaadiid la'aan maadaama baabuurta aanay gaari karin ama ay ku qaadato maalin iyo ka badan.

Tusaale ahaan; Qofka mas ama abeeso (bahal-hoose) qaniinto daawadiisa waa in lagu kaydiyo qaboojiye joogto ah, deegaanadaasu ma leh quwad koronto iyo qaboojiyayaal lagu hayo daawadaas. Taasi waxay keentay in magaalooyinka waaweyn ee laamiga ku yaal oo keliya daawooyinkaas laga helo. Dawladduna ma hayso dhaqaale ay ku daboosho baahiyahaas, hay'adaha samafalkuna waxay u badan yihiin inay meelaha laamigu ku yaal ama u dhow yahay gacansiintoodu u badato. Taasi waxay sababtay in maqnaanshaha adeegyada dawladda ee deegaanadaas ay argagixisadu fariisimo ka samaystaan iyo dad iyaga u shaqeeya, ayna dawladda iyo shacabka ku dhibaateeyaan. Dawladdu iyadoo ka jawaabaysa amnidarrada ay wadaan argagixisadu, ayey u dirtaa ciidamo la dagaalama kooxahaas. Dagaalkaas waxyeello ayuu soo gaarsiiyaa dadka shacabka ee deegaanadaas ku nool. Waxaana ka dhalata barakac iyo amni-darro saamayn ku yeelata xuquuqda aadanaha. Gacan ku haynta iyo joogtaynta meelaha argagixisada laga saaro waxay u baahan yihiin dhaqaale iyo awood ciidan oo joogto ah, taasoo dawladda culays weyn ku ah.

Hase yeeshee, xukuumadda Puntland waxay xoog saartay tayaynta ciidanka Puntland, inkastoo ciidanku geystaan xadgudubyo marmarka qaarkood dhaca maadaama ogaanshaha xuquuqda aadanaha ee ciidamada la geeyo goobahaas ay aad u hooseyso. Waxaa kaloo saamayn taban ku yeeshay adeegyada aasaasiga bulshada faafitaanka cudurka koroonaha oo hakad geliyey mashaariicda horumarinta iyo amniga.



**Sawir 9.**

Tababar loo qabtay howl-wadeenada Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland oo lagu dardar galinayo waajibaadka iyo Howl-socodsiinta Shaqada Xafiiska [30 Agoosto 2020]

# QAYBTA 3-AAD



## 3.0 AWOOD-DHISIDDA IYO WADA SHAQAYNTA BAHWADAAGTA XDXAP

### 3.1 Korjoogtaynta iyo dib u eegista barnaamijyada XDXAP

Xafiisku wuxuu sameeyay qiimeyn iyo dib-u-eegis gudaha ah ee barnaamijyada iyo hannaanka howl-socodsiinta. Hay'adaha SSF, RI, DIAKONIA, & UNDP ayaa iyaguna qiimeyn iyo hubinta xisaabaadka ku sameeyey mashaariicda xafiisku wado. kuwaas oo ay ka soo baxeen natiijooyin wanaagsan, xafiiskuna ku noqday mid aan halis maaliyeed lahayn ama ku yar tahay (Financial Risks). Waxaa sidoo kale kal-warbixineedka sanadkan kor loo qaaday awoodda iyo aqoonta hawl-wadeenada xafiiska iyadoo la siiyey tababarro iyo siminaaro aqoon kororsi ah. Tababarrada ayaa isugu jira kuwa xafiisku qabanqaabiyey, kuwa bahwadaagta ay bixinayeen iyo kuwa ay iska kaashadeen.

Waxa dib u eegis lagu sameeyay hannaanka xulashada, qorista, qiimeynta iyo abaalmarinnada shaqaalaha xafiiska si kor loogu qaado tayada waxqabad ee barnaamijyada shaqo. Xafiisku si uu u guto waajibkiisa shaqo, wuxuu si joogta ah uga yahay xubin firfircoon shirarka iyo kulamada xog-wadaagga ee bahwadaagta arrimaha xuquuqda aadanaha ay qabtaan. Shir walba waxaa ka qaybgalay saraakiisha xafiiska u xilsaaran hawsha shirku khuseeyo.

Xafiisku wuxuu dib u habayn iyo dhaqan gelin ku sameeyey barnaamijka maaraynta xogta xafiiska (Data Base) ee ku dabran mareegta xafiiska [www.ophrd.pl.so](http://www.ophrd.pl.so) iyadoo si joogta ah loogu cusboonaysiiyo hadba dhacdada/dacwada ama xogta soo korodha si ay u noqoto mid la jaan-qaadda xaaladda shaqada iyo warbixinnada xafiiska. XDXAP isagoo kaashanaya hay'adda Diakonia wuxuu diyaariyey qaybta Qiimaynta iyo Dabagalka Mashaariicda (M&E Unit) iyo Qorshaha Maaraynta Bedqabka Shaqaalaha Xafiiska (Risk Management Plan). Qaybahaan oo ka mid ah talooyinka casriyeynta iyo dib-u habaynta xafiiska hannaankiisa shaqo oo ay soo jeediyeen Bankiga Adduunka iyo shirkadda Basemark oo horey qiimayn ugu samaysay xafiiska.

### 3.2 Waxqabadka XDXAP

**Hawlaha xafiisku qabtay lixdii bilood ee ugu dambaysay sanadka 2020:-**

- Xafiisku wuxuu adeeggiisa ku baahiyey degaano cusub.
- Dhammaystirka qorshaha istiraatiijiyadda xafiiska 2021-2023
- Dib-u-habaynta iyo dardargelinta shaqada xafiiska iyo tababarista shaqaalaha, iyadoo la xoojinayo isla xisaabtanka iyo wadashaqaynta
- Dhaqangelinta siyaasadaha hawl-socodsiinta ee xafiiska
- Qabashada shir sanadeedka XDXAP ee Guddoomiyaha, Wakiillada Gobollada iyo Hawl-wadeenada
- Samaynta guddiga farsamada iyo hawl-socodsiinta mashaariicda xafiiska



- Safarro loogu kuurgalayo xaaladaha xuquuqda aadanaha ee Gobolada iyo Degmooyinka Puntland
- Abaarulidda iyo isku xirka bahwadaagta xuquuqda aadanaha si kor loogu qaado iskaashiga iyo wadashaqaynta
- Diyaarinta iyo tayaynta warbixin-xilliyeedka iyo baahinta adeegyada sharci

### 3.3 Fidinta adeegga xafiiska ee degaannada cusub

Fidinta Adeegga shaqo ee xafiiska ayaa la gaarsiiyey deegaano cusub oo ka mid ah deegaannada fog-fog ee gaariwaaga loo yaqaan iyo kuwa ka leexsan laamiga. Xafiisku wuxuu tababaro iyo xog ururin u tagay degmooyinka iyo tuulooyinka Bali-xagar, Muudiye, Dibir, Hoodaa, Ceel-quud, Waadikhayr, Gumbax iyo Jeedaal oo ka tirsan degmooyinka Balidhidin, Caluula, Baargaal, Xaafuun, iyo Ufeyn ee gobolada Bari iyo Gardafu, sidoo kale deegaanada Dhooba-cantuug, Dhanaane, Cambarre, Baqbaq iyo Cuun oo ka tirsan degmooyinka Garowe, Godob-Jiiraan, Eyl, Dangoroyo ee gobolada Nugal iyo degmooyinka, Saaxo, Xarfo iyo Tawfiq ee gobolka Mudug iyo degmooyinka Boocame iyo Taleex ee gobolka Sool. Sidoo kale degmooyinka Baran iyo Dhahar ee gobolada Haylaan iyo Sanaag.

### 3.4 Dhisidda Awoodda iyo Mugga Waxqabadka XDXA Puntland

Xafiisku wuxuu xoojiyey, isla markaas baahiyey awoodda iyo mugga waxqabad ee hay'ad ahaan iyo shaqaale ahaan si Xafiisku u fuliyo waajibaadyadiisa shaqo. Xafiisku wuxuu kordhiyey tayada iyo waxqabadka shaqaalaha. Xafiisku wuxuu adeegiisa ku baahiyey deegaano cusub. Waxaa la qabtay aqoon-isweydaarsi iyo tababaro ku saabsan hawl-socodsiinta goobaha shaqada, adeegsiga aaladaha xog ururinta, samaynta warbixinaha, wada-shaqeynta hay'adaha bahwadaagta iyo dhiirigelinta xuquuqda aadanaha. Tababaradaas iyo aqoon iswaydaarsiyadaas waxaa ka qayb-qaatay dhammaan heerarka kala duwan ee shaqaalaha XDXAP. Waxaa kaloo xafiisku dib u eegis ku sameeyey hanaanka shaqada, qorshaynta, tababarada, saacadaha shaqada, isla xisaabtanka, qiimaynta shaqaalaha iyo korjoogtaynta hirgelinta barnaamijyada. Xafiisku wuxuu jaangooyey jadwalka kulamada kala duwan ee wakiilada gobolada iyo hawl-wadeenada XDXAP.



**Shaxda 5. Dhisidda Awoodda Hawl-Wadeenada Xafiiska Sanadka 2020**

TR	Faahfaahinta Tababarka/ Aqoon-is weydaarsiga	Tirada la Tababarey	Hay'adda Fududeyey	Busha 2020	Goobta
1	Tababarka ku saabsan nidaamka macluumaadka maareynta maaliyadeed ee xisabaadka ee Puntland (PFMIS)	2	Wasaradda Maaliyadda(Hoolkeda)	February	Garowe
2	tababar Maamulka waxqabadka, shaqaalaysiinta ku saleysan mudnaanta iyo xqiimeynta Shaqada iyo Qeexida shaqo	2	Wasaradda Qorsheynta (hoolkeeda)	Feberuary	Garowe
3	Buugga tababarka ansaxinta ee hay'adaha garsoorka ee Puntland oo ku saabsan caddaaladda ka jawaab celinta Jinsiga ee ku saleysan falalka kufsiga	2	Wasaaradda Cadaallada (Hoolkeda)	February	Garowe
4	Aqoon-isweydaarsi Tababar ku saabsan Shaqeynta Hay'adaha Shaqada iyo Dhiirigelinta Xuquuqda Aadanaha (30ka Ogosto 1-September 2020)	26	XDXAP( Hoolka Xafiiska)	Ogosto-Sept	Garowe
5	Tababbarka waxqabadka ee dacwad oogayaasha booliska socdaalka, shaqaalaha Dowladda hoose iyo ururada bulshada rayindka ah	1	Tadamun Social society	June	Garowe
6	Tababbarka latalinta cilmi-nafsiyeedka ee shaqaalaha Kiisaska GBV	1	Wasaradda Haweenla	June	Garowe
7	Tababar dhisid karti oo ku saabsan ka mid noqoshada iyo daryeelka dadka naafada ah oo ay ku jiraan CWD Mashruuca iyo siyaasadaha isticmaalaya CPD.	1	Wasaaradda Cadaallada	Sept	Garowe
8	Tababar lagu dhisayey awooda iyo ka qeyb galka dadka baahiyaha gaarka ah qaba (CWD iyo CPD)	1	Wasaradda cadalada	Sept	Garowe



**Sawir 10.**

Tababar loo qabtay howl-wadeenada Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland oo lagu dardar galinayo waajibaadka iyo Howl-socodsiiinta Shaqada Xafiiska [30 Agoosto 2020]

### 3.5 Agabka Xafiisyada

Sanadkii 2020, Xafiisku wuxuu qalab xafiiseed ka helay hay'adaha SSF iyo Diakonia.

#### Shaxda 6. Agabka Xafiisku Ka Helay SSF

Asset Name	Description	QTY	Location	Donor	Acquisition Date
Office Desk	Simple Desk	8	Garowe	SSF	01—1-2020
chair	Visitor chairs	3	Garowe	SSF	01—1-2020
Chair	Plastic chairs	10	Garowe	SSF	01—1-2020
Chair	Small Chairs	3	Garowe	SSF	01—1-2020
Chair	Conference	8	Garowe	SSF	01—1-2020
Chair	Meeting Chairs	11	Garowe	SSF	01—1-2020
Table	Conference Table	1	Garowe	SSF	01—1-2020
Photo Copy	Photo copy	1	Garowe	SSF	01—1-2020
Cupboard	Cupboard	5	Garowe	SSF	01—1-2020
Printer	HP LaserJet	2	Garowe	SSF	01—1-2020
Camera PC2003 4.3 V	8714574610276	1	Garowe	SSF	01—1-2020
Computer	Laptop Dell	4	Garowe	SSF	01—1-2020
Camera	Canon Legtria HF G10 (Made in Jaban)	1	Garowe	SSF	01—1-2020

**Shaxda 7. Agabka Xafiisku Ka Helay Diakonia**

S/N	Asset Name	Description	QTY	Location	Condition	Donor	Acquisition Date
1	Laptop	Lenovo yogo i5 8GB SSD 256GB	1	Garowe	Function good	Diakonia	12/9/2020
2	Laptop	Lenovo laptop ThinkPad e490 8GB HDD ITB	1	Garowe	Function good	Diakonia	12/9/2020

### 3.6 Isku Xirka Bahwadaagta iyo Daneeyayaasha Xuquuqda Aadanaha Puntland

Xafiisku wuxuu abaabulay kulamo ay ka soo qaybgaleen bahwadaagta iyo daneeyayaasha ay ka mid yihiin wakiilada dadka u nugul xadgudubyada (dadka baahiyaha gaar ah qaba, carruurta iyo haweenka iyo dadka soo barakacay), hay'adaha sharci fulinta ee dawladda, ururada bulshada iyo hay'adaha samafalka iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha. Kulamada oo looga wada-hadlay ka qaybgalka qorshaha istiraatiijiyadda 2021-2023 ee xuquuqda aadanaha puntland. Kulamadaas waxaa kaloo ka soo baxay horumarinta wada-shaqaynta iyo isku xirnaanta daneeyayaasha xuquuqda aadanaha Puntland.

Waxaa kaloo xafiisku ka qayb-qaatay qorshayaasha shanta sano ee horumarinta Puntland iyo qorshaha horumarinta qaranka Soomaaliya si horumarinta iyo difaacidda xuquuqda aadanaha ay uga mid noqoto mudnaanaha waxqabadka Shanta (5) sano ee soo socota. Xafiiska waxay si mug leh u wada shaqeeyaan hay'adda dallada bulshada rayidka ee PUNSAA, Boliiska Puntland, Ururada bulshada iyo maamullada degmooyinka, Guddiga golaha wakiilada ee xuquuqda aadanaha Puntland, hay'adaha Quruumaha midoobay ee UNDP, UNSOM iyo UNICEF. Qaabilaadda xafiiska wafdi ka socda OCHA Soomaaliya oo ay hogaamineyso Cindy Issac ku xigeenka xafiiska OCHA Soomaaliya, waxaana laga wada hadlay tabashooyinka Xuquuqda Aadanaha ee Puntland ka jira iyo gaar ahaan welwelka bani'aadanimu ee barakacayaasha iyo dadka nugulka ah ee bulshada.



**Sawir 11.**

Kulan ay yeeshen Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha iyo wafdi ka socda Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isuduwidada Howlaha Bini'aadanimada Soomaaliya (UNOCHA Soomaaliya), oo ka wada hadlay Barnaamijka Shaqo, gaar ahaan Xaaladaha Barakacayaasha ku no ol Xeryaha Puntland. [3 Diseember 2020]



**Sawir 12.**

Kulan ay yeesheen Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland iyo Ururada Bulshada Rayidka ah ee Puntland (PUNSA) oo diiradda lagu saarayay xoojinta, wadashaqaynta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha gaar ahaan Bulshadda Rayidka ah [21 Diseember 2020]

### Shaxda 8. Shirarka Xafiisku ka Qayb Galey

TR	Cinwaanka Shirka	Bisha 2020	Goobta	Cida Taageertay
1	Shirka waxaa laga hadlayey kajawaabida adeegyada ay helaan goboladda Puntland CP/GBV	Janaayo	Wassarada Haweenka	Wassarada Haweenka Puntland
2	Shirkan wuxu ku saabsanaa qorshaha fulinta sharciga caddaaladda dhalinyarada 2020-2023	Janaayo	Wassarada Haweenka	Wassarada Haweenka Puntland
3	Adeeg bixiyayaasha badbaadada Qoysaska	Janaayo	Wasaradda Haweenka Puntland	UNICEF
4	Aqoon isweydaarsi ku saabsan xuquuqda aadanaha iyo wacyigelinta	Janaayo	New Rays Hotel	Kaalo
5	Shirka laga hadleyey wadamada siya dhaqaalaha dadka qaba HIV	Janaayo	Wasarada Cafimaadka	Pac/Hayada IDS
6	1.Hubinta cadaalad helida dhibanayaasha xuquuqda aadanaha 2. kiisaska u baahan ka jawaabidda degdega ah 3. Horumarinta iyo adkeynta xiriirka bahwadaagta iyo adeegayaasha xuquuqda aadanaha	Janaayo	XDXAP	XDXAP
7	Kulan wadatashi oo loogu talagalay la-hawlgalayaasha ururada bulshada rayidka ah iyo Bangiga adduunka	Janaayo	UNSOH	Bank Aduunka
8	shir laga hadleyey Qeybta cadaaladda iyo kulanka iskuxirka daneeyayaasha	Janaayo	Wasaradda Cadaalada Puntland	Wasaradda Cadaalada Puntland



9	shirka Wacyigelinta rabshadaha jinsiga, ka hortagga iyo ka jawaab celinta	Janaayo	XDXAP	XDXAP
10	Kulan hirgelinta halkudhigyada caalamiga ee xuquuqda aadanaha sanadka 2020	Janaayo	XDXAP	XDXAP
11	shirka looga hadlyeyey Deeqaha 2018-2020 ka hortaga AIDska	Janaayo	Wassarada Cafimaadka	Pac/Hayada IDS
12	Kulan lagaga hadleyey dowladda Puntland 2020-2024, amniga iyo sareynta sharciga	Janaayo	Wassarrada Qorsheynta	Wassarrada Qorsheynta
13	Kulanka ayaa looga hadlay qorshaha istiraatiijiyadeed iyo sidoo kale soo bandhigida xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha iyo TPEC	Janaayo	TPEC	TPEC
14	Falanqeynta Wadciga Barnaamijyada Soomaaliya	Febraayo	Diakonia	Diakonia
15	shir laga hadleyey GBV, Maareynta Kiiska	Febraayo	Wasaradda Haweenka	Wasaradda Haweenka
16	shirka Wadaagista macluumaadka iyo wacyigalinta xuquuqda naafada ee udhaxeysa MWHRD FGS iyo OPHRD ee Dowlada Puntland.	Febraayo	Wasaaradda Haweenka ee Heer Federaal , Heer Puntland iyo XDXAP	Wasaaradda Haweenka ee Heer Federaal , Heer Puntland iyo XDXAP
17	shir looga hadleyey Qeybta cadaaladda iyo kulanka iskuxirka daneeyayaasha dadka naafadaha ah	Maarso	Wasaradda Cadalada	Wasaradda Cadalad
18	shir looga hadleyey Istaraatiijiyadda Hirgelinta, Korjoogteynta iyo Qiimeynta ee qorshaha shanta sano ( 2020-2024)	Maarso	Wasaradda Qorsheynta	Wasaradda Qorsheynta
19	Shirka looga hadlay sharciga doorashooyinka	Maajo	TPEC	TPEC
20	shir Doodda kulanka dhex maray dhammaan agaasimayaasha hay'adaha Puntland iyo TPEC	Juune	TPECT	TPECT
21	shir laga hadlyeyBaahinta siyaasadda kormeerka iyo istaraatiijiyada qiimeynta ee Puntland.	Luulyo	Wasaradda Qorsheynta	Wasaradda Qorsheynta
22	Shir laga doodayey qaab dhismeedka sharciga wasarada iyo hayadaha khuseeya	Luulyo	Wasadarada Haweenka	Save Children
23	shir looga hadlayey Soo gudbinta qorshe sanadedka hayadaha dowladda	Agoosto	wasaradda qorsheynta	wasaradda qorsheynta
24	kulan dood kooxeed oo ku saabsan sareynta sharciga loona adeegsadey alaadda internetka	Agoosto	wasaradda cadaalada	wasaradda cadaalada




25	isku duwida barmaamujyada jinsiga iyo ilaalinta xuquuqda caruurta oo loogu jawaabayey cudurka covid 19	Agoosto	Wasarada Haweenka	Save children
26	shirka ku saabsan Xirfad-yaqaan iyo daryeel-bixiye adeeg bulsho si loo taageero xoojinta qoyska	Agoosto	Wasaradda Haweenka	Save Children
27	Shirka looga hadlayey Shahaado siinta Ururada siyaasadda ee Puntland	Agoosto	TPEC	TPEC
28	Kulan hordhac ah oo udhaxeeya difaacaha cusub ee xuquuqul insaanka Puntland iyo UNSOM	Agoosto	XDXAP	UNSOM
29	kor uqaadista howl qabadka xirfada shaqalaha iyo Xuquuqda Adamaha (XDXAP)	Sebtember	XDXAP	XDXAP
30	kulan looga wada hadlayey sharciga ama xeerka dadka baahiyaha Gaarka ah qaba	Sebtember	Wasarada haweenka ee dowladda federalka	Wasarada Haweenka
31	Shirka ayaa looga hadlay qoondada haweenka Puntland ee dowladda federaalka Soomaaliya si loo sharciiyeeyo	Sebtember	Wasaradda Haweenka Puntland	Wasarada Haweenka
32	shir laga hadleyey Maalinta dadka baahiyaha maqalka leh ee adduunka	Sebtember	PDRC	Daladda ururka naafada Puntland
33	awood siinta iyo shaqa galinta haweenka ee xirfadaha badda	Sebtember	Wasaradda Haweenka Puntland	EUCAP
34	korjoogteenta iyo qiimeynta taagero farsamo iyo maaliyadded ee mashquuca SSF COVID -19	Sebtember	SSF	SSF
35	shirkada daryeelka iyo dhowrista, hayadaha ka shaqeeya caruurta iyo Jinsiga	Oktober	Wasaradda Haweenka	Wasaradda Haweenka


### 3.7 Wadaagista iyo Maareynta Xogta

Waxaa la casriyeeyey maaraynta xogta lana hawlgeliyey Saabka Kaydinta Xogta kiisaska xafiisku maamulo (Data Base Management and Data Storing) taas oo looga gol-leeyahay in xafiisku maareeyo xogta uu ururiyo laguna kaydiyo meel shacabka, dawladda iyo hay'adaha bah-wadaagta xuquuqda aadanaha ay si fudud uga heli karaan xogta iyo wax qabadka xafiiska ugana faa'iidayaan karaan adeegyada ay qabanayaan. Howsha kaydinta iyo maaraynta xogta ayaa bilaabantay sanadkii hore, balse waxay si buuxda u hanaqaaday sanadkan 2020 oo shaqaalaha xafiisku ay si mug leh ula jaanqaadeen. Sida aad ka arkayso shaxda hoose, mareegta xafiiska [www.ophrd.pl.so](http://www.ophrd.pl.so) ayaa si fudud looga helayaa saabka xogta (Data Base). Tallaabadaan ayaa ah diyaarin dhigaal aqooneed ee hay'adaha dawladda iyo jilalka cilmi-baarayaasha ka faa'iidayaan.

Sawir 12. Saabka Xog keydinta dhacdooyinka Xaaladaha Xuquuqda Aadanaha ee XDXAP 2020



Sawir 13. Saabka Xog keydinta dhacdooyinka Xaaladaha Xuquuqda Aadanaha ee XDXAP 2020



Sawir 14. Xogta Baraha Bulshada ee XDXAP 2020



Sawir 15. Kulana Fogaan a rag oo uu ka qayb qaatay Difaacaha Xuquuqda Aadanaha ayna qabanqaabisay Xafiiska UNDP Soomaaliya kuna saabsanaa Kal-Fadhiga Dib-u eegista Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha (UPR) [Disember 2020]



**Sawir 16.**

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo hubinaya diwaanka maxaabiista ee xabsiga Gaalkacyo.  
[Oktober 2020]

# QAYBTA 4-AAD

## 4.0 WACYIGELINTA, U QAREEMIDDA & TAABAGELINTA XUQUUQDA AADANAHA

### 4.1 Wacyigelinta

U ololeynta iyo wacyigelinta xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ayaa ah shaqooyinka mudnaanta leh ee xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha sida laga dheehan karo Dastuurka Puntland qodobkiisa 118aad iyo Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha qodobkiisa 12aad. Talaabada ugu haboon ee looga hortagi karo loogana baaqsan karo in tacadi iyo gaboofal xuquuqda aadanaha dhaco waa in la sameeyo wacyigelin, waana in mas'uul kasta oo xil bulshada u haya uu yaqaano waajibka sharci ee ka saaran qof kasta oo shacab ah, xuquuqda uu leeyahay iyo hadii uu tacaddi ama gaboofal sameeyo waxa uu filan karo oo ciqaab ah.

**Xafiisku isagoo hiigsanaya Istaraatiijiyadda kor lagu xusay wuxuu qaaday talaabooyinka soo socda;**


- Xafiisku wuxuu tababaro iyo aqoon kororsi u sameeyey hawl-wadeenada maxkamadaha, booliiska, bulshada, dambi-baarayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha, suxufiyiinta, barakacyaasha iyo ururada bulshada rayidka ah oo ay ku jiraan dhalinyarada, haweenka, culimada iyo oday dhaqameedka.



**Sawir 17.**

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo uu weheliyo Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee DPL ayaa Tababar Wacyi-gelina usoo xiray Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliiska oday-dhaqameedka. [Disember 2020]

- Hirgelinta barnaamijyo wacyigelin bulsho oo ka baxa TVyada, idaacadaha, baraha bulshada sida facebuugga, twitterka, youtubeka, kuwaas oo dhammaan loogu talagalay inay bulshada qaybaheeda kala duwan gaaraan iyagoo xambaarsan fariinta dhawrista iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha, dadkana la barayo xuquuqda ay leeyihiin iyo hadii lagu tacadiyo sidii ay ugu gudbin lahaayeen cabashadooda laamaha caddaaladda.



Sawir 18.

Xafiisku isagoo kaashanaya Hay'ada SSF, wuxuu diray fariin qoraaleed wacyigelinta Xuquuqda Aadanaha u gudbiyey bulshada ku nool deegaannada Puntland, taas oo loo marsiiyey moobaylada gacanta lagu qaato.

- Xuska maalmaha caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, sida maalinta caalamiga ee ka hortaga ku shaqaysiga carruurta, maalinta caalamiga ee haweenka difaacayaasha xuquuqda aadanaha, maalinta caalamiga ee xuquuqda aadanaha. Ujeedada xuska maalmahaan ayaa ah in dadka la xasuusiyo laguna wacyigeliyo xuquuqaha la dhawray ee gaarka ah oo la xiriirta mawduuca maalintaas, sida; carruurta, haweenka, naafada, IWM.



Sawir 19.

XDXAP oo soo agaa simay Xuska maalinta caalamigaah ee Haweenka Difaacayaasha Xuquuqda Aadanaha, oo lagu qabtay PDRC Garoowe laguna gudoonsiiyay shahaado sharaf iyo abaalmarino, Xubnaha Firfircoon ee u dhaq-dhaqaaqa arrimaha Haweenka. [29 November 2020]



**Sawir 20.** XDAP ayaa ku qabtay Xuska maalinta caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha magaaladda Boosaaso. [10 Disember 2020]

- Xafiisku wuxuu kaloo qaybiyey 1,500 buugaag-gacmeedyo sida buugga Aqoonso Xuquuqdaada Aadamnimo, waraaqo wacyigelin ah (brochures & stickers) iyo taagis tabelayaaal meelaha fagaaraha ee dadku arki karaan, sidoo kale xafiisku wuxuu qaybiyey warbxin sanadeedkii 2019 Diiwaangelinta dhacdooyinka tacadiyada iyo gaboodfalada xuquuqda aadanaha, gaar ahaan kuwa haweenka, carruurta, barakacayaasha, naafada, suxufiyiinta, siyaasiyiinta iyo xubanaha kale ee u ololeeya arrimaha bulshada.

### Shaxda 9. Qaybinta Buugaag, Tabbeelooyin iyo Istiikarada wacyi-gelinta (Awareness on IEC)

Tr.	Nooca wacyigelinta	Tirad buugta la qaybiyey	Degaanada laga qabiyeey	Gobolka
	Fariimo qoraaleed Xuquuqda Aadanaha	1300	4 degmo	Bari, Karkaar, Mudug iyo Nugaal
	Buug gacmeedka Xafiiska	1000	4degmo	Bari, Karkaar, Mudug iyo Nugaal
	Tabelayaal	10	4 degmo	Bari, Karkaar, Mudug iyo Nugaal
	Habraac maaraynta khilaafaadka	200	16 degmo	Bari, Karkaar, Mudug, Nugaal, Sool, Gardafuu, Sanaag iyo Hayland
	Habraaca u qareemida Xuquuqda Aadanaha	250	16 degmo	Bari, Karkaar, Mudug, Nugaal, Sool, Gardafuu, Sanaag iyo Hayland
	Hagaha korjoogtaynta iyo Barista Xuquuqda Aadanah	300	16 degmo	Bari, Karkaar, Mudug, Nugaal, Sool, Gardafuu, Sanaag iyo Hayland
	Warxibin sanadeedka XDXAP 2019	550	4 Degmo	Bari, Karkaar, Mudug, Nugaal,
	Kofiyado, Tabeebayaal iyo funaanado	250	2 Degmo	Bari iyo Nugaal
		3,854 agab ah	66 Degmo	


**Shaxda 10. Wacyi-gelinta warbaahinta ee bulshada**

Tr.	Nooca wacyigelinta	Aalada Tebinta	Muddada Wacyigelinta	Ka Faa'iidaystayaasha	Tirada La Gaaray
	Xafiisku wuxuu diray fariin qoraaleed wacyigelin Xuquuqda Aadanaha.	Moobaylada Gacanta	Febaraayo-Disembar 2020	Dad weynaha Puntland ku nool	1,325,411qof
	Wacyigelinta Xuquqada Aadanaha iyo Cudurka COVID-19	Facebook(@ophrd14)	Nufeembar-Octoobar 2020	Dad weynaha Puntland ku nool	70,892 qof
	Xafiisku wuxuu diray fariin wacyigelin COVID-19 loogu tala galay dadka aragga iyo maqalka naafada ka ah	TVga DPL	Dhammaan dadwaynaha	Ma'xadidna	SSF/X.X.D. A



**Sawir 21.** Buugaag Gacmeedyo iyo Tabeeloyin lagu wacyi-gelinayo Da dweyna ha

- Xafiisku isagoo kaashanaya Hay'adda SSF, wuxuu diray fariin qoraaleed wacyigelin Xuquuqda Aadanaha u gudbiyey bulshada ku nool deegaannada Puntland, taas oo loo marsiiyey moobaylada gacanta lagu qaato.



**Sawir 22.** Xafiisku isagoo kaashanaya Hay'ada SSF, wuxuu diray fariin qoraaleed wacyigelinta xuquuqda Aadanaha u gudbiyey bulshada ku nool deegaanna da Puntland, taas oo loo marsiiyey moobaylada gacanta lagu qaato. [Agoosto 2020]

- Xafiisku wuxuu fariimo wacyigelineed ku gudbiyey baraha bulshadu ku wada xiriirto



Office of Puntland Human Rights Defender

Published by Mustafe Huruuse · December 11, 2020 ·

Dabaal-degga xuska maalinta caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha oo Boosaaso ka qabsoontay. Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland ayaa munaasabadda ku qabtay 10 Decemeber 2020 iyadoo ay ku lammantahay xiritaanka ololaha 16-ka maalmood ee ka hortagga Tacadiyada ka dhanka ah Haweenka. Ururada bulshada, hay'adaha caalamiga ah, kuwa maxaliga ah, masuuliyiin ka tirsan xukuumadda iyo qaybaha kala duwan ee bulshada ayaa ka qayb-galay munaasabaddan si heer sare ah loo agaasimay ... See More



**Sawir 23.** Xafiisku wuxuu farimo wacyigelineed ku gudbiyey baraha bulsha du ku wada xir iirto

- Xafiisku isagoo kaashanaya Hay'ada Diakonia wuxuu bulshada ka wacyigeliyey ku shaqaysiga Caruurta iyadoo kulamo lagu qabtay meelaha bulshadu isugu timaado

### Shaxda 11. Gaarsiinta Xafiiska Deegaanada fog-fog 2020

Tr.	Gobolka	Degaanka
	Bari	Canjeel, Iskushuban, Xaafuun, Xiriiro, Balidhidin, Kobdhexaad, Xarago, Turmasale, Dawacaley, Dharjaale, Meeladeen, Tisjic Geesaqabad, Xamure, Beliwacatay iyo Balidooq
	Gardafuu	Saynyar, Dayaxa, Geesalay Murcanyo, Qoraxaad, Bilaal, Ceel-laas, Tooxin, Saynwayn iyo Taageer
	Sool	Taleex

## 4.2 Taabagelinta iyo u Qareemidda Xuquuqda Aadanaha

**Hawlaha horumarinta iyo taabagelinta u qareemidda xuquuqda aadanaha ee la fuliyey waxaa ka mid ah:**

- Qabashada Shan (5) shir oo heer sare ah ay ka soo qaybgaleen 200 qof oo ka kala socda daneeyayaasha Xuquuqda Aadanaha, shirarkaas oo ujeedadoodu ahayd kor uqaadidda iyo u-qareemidda Xuquuqda Aadanaha degaannada Puntland.

#### Shirka 1aad:

- Kulan Aqoon is-weydaarsi oo ku saabsan kor u qaadidda Xuquuqda Aadanaha iyo Wacyigalinta COVID-19 oo xafiiska difaacuhu ugu qabtay Garoowe bulshada rayidka ah, shaqaalaha xafiiska xuquuqda aadanaha, culimada diinta, iyo odoyaasha dhaqanka.



Sawir 23

**Sawir 24.** Kulan Aqoon is - weydaarsi kor loogu qaadayo taabo-gelinta Xuquuqda Aadanaha iyo Wa cyiga COVID-19 oo loo qabtay Bulshada rayidka ah, Shaqaalaha Xafiiska Xuquuqda Aadanaha, Culima da Diinta, iyo Odoyaasha dha qanka. [19 Disember 2020]

- Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland ayaa qabtay munaasabad heerkeedu sarreeyo oo lagu xusay maalinta caalamiga ah ee Haweenka Difaacayaasha Xuquuqda Aadanaha. Munaasabadda oo ka dhacday hoolka shirarka PDRC ayaa Guddoomiyaha Difaacaha Xuquuqda Aadanaha shahaadooyin ku guudoonsiiyey qaybaha haweenka ee shaqooyinka xoogga leh ka qabtay difaacidda xuquuqda haweenka sannadka 2020.



**Sawir 25.** XDXP oo Guddoonsiiyay Shahaado Sharafeedyo Munaasabadda Maalinta Difaacayaasha Xuquuqda Haweenka. [29 Nofember 2020]

- XDXAP ayaa xuska maalinta caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ku qabtay Boosaaso 10 Disember 2020, iyadoo ay ku lammantahay xiritaanka ololaha 16-ka maalmood ee ka hortagga Tacadiyada ka dhanka ah Haweenka.



**Sawir 26.** XD XP oo Gu ddo onsiyay Suufiyiin Shah aado Sharafeedyo Munaasabadda Maalinta Xuquu qda Aadanaha. [10 Disember 2020]

- Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha ayaa soo af-meeray tababar ku wajahnaa wacyi-gelinta Karoona Fayrus iyo kor u qaadidda xuquuqda aadanaha ee loo qabtay macallimiinta Iskuullada iyo ardayda baahiyaha gaarka ah qaba. Waa tababar noociisa ah kii ugu horeeyay ee dadka baahiyaha gaarka ah loogu qabto Puntland intii lagu jiray xaaladan COVID-19 oo khatar ku ah dadka nugul.



**Sawir 27.** Fariimo Wacyi-galineed maqal iyo muuqaal ah oo ku saabsan COVID-19, loona qabtay Dadka Baahiyaha Gaarka ah leh, oo ay kamid yihiin Da dka Aragga iyo Maqa Ika Naafadda ka ah. [September - Disember 2020]

- Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha ayaa ka qayb-galay munaasabadda xuska maalinta caalamiga ah ee luuqadda dadka maqalka naafadda ka ah (Sign Language). Wuxuu dhegastay farriimaha ardayda iyo macallimiinta ay soo gudbinayaan ee munaasabadda ka soo qayb-galay, kuwaas oo cabasho xoog leh ka muujiyay duruufaha ay wax ku bartaan, agabka iyo dhismaha iskuuladooda iyo hab-dhaqanka ay kala kulmaan ciidamada iyo xafiisyada kale ee Dawladda.



**Sawir 28.**

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha ayaa ka qayb-galay munaasabadda xuska maalinta caalamiga ah ee luuqadda dadka naafadda ka ah dhegaha (Sign Language). [23 Sebtember 2020]



**Sawir 29.**

Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha iyo qayb ka mid ah culima'udiinka Puntland oo ka wada hadlaya maxaabiis u xiran daymo magdhowyo loo haysto sidii looga caawin la haa [Disember 2020]

- Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo kula kulmay Taliye Ku-xigeenka Booliska Puntland xafiiskiisa, taas oo looga wada-hadlay bixinta xuquuq magdhow ee uu leeyahay muhaajir ka soo jeeda Dalka Bangladesh oo dhaawac ka soo gaaray howlgal Boosliisku kawaday magaalada Garowe.



**Sawir 30.**

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo kula kulmay Taliye Ku-xigeenka Booliska Puntland xafiiskiisa, taas oo looga wada-hadlay biinta xuquuq madhow ee uu leeyahay muhaajir kasoo jeeda Da Ika Banga la desh oo dhaawac ka soo gaaray howlgal Boosliisku kawaday magaalada Garowe [20 Nofember 2020]

- XDXAP oo tababar aqoon is-waydaarsi kusaabsan xuquuqda aadanaha ah u qabtay bulshada rayidka ah, shaqaalaha xaruumaha COVID-19, Culimada Diinta iyo Odoyaasha dhaqanka. U jeedada tababarka ayaa ahaa kor u qaadida wacyiga xuquuqda aadanaha iyo ka hortagga faafitaanka COVID-19.



**Sawir 31.** Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland oo DaahFuray Tababar aqoon is-waydaarsi oo ku saabsan xuquuqda aadanaha, lo ona qabtay Bulsha da rayidka ah, Shaqaalaha Xaruumaha COVID-19, Culimada Diinta iyo Odoyaasha dhaqanka. [Sebtember 2020]

- Xafiisku wuxuu korjoogtayn iyo Baaris ku sameeyey xaalada Xuquuqda Aadanaha ee ka jirtaa 12ka Degmo oo kala ah: Xarfo, Boocame, Taleex, Godob-jiraan, Dangorayo, Waaciye, Carmo, Dhahar, Badhan, Iskushuban, Baargaal iyo Xaafuun.



**Sawir32.** Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo la kulmay Howl-wa deenada Xarunta Caafimaadka ee Degmada Taleex. [Nofember 2020]



**Sawir 33.** Xafiliska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo la kulmay Saraakiisha Saldhiga Dhexe ee Ciidanka Booliiska Degmada Baran. [Nofember 2020]

- Xafiisku wuxuu u qabtay 2 shirwayne ee ay ka soo qaybgaleen 250 qof oo Bulshada qaybeheeda kala duwan ah Xuska maalinta caalamiga ah Haweenka Difaacayaasha Xuquuqda Aadaanaha 29ka Nufeembar, 2020 Garowe lagu qabtay iyo Xuska maalinta caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha 10ka Diseembar, 2020 Bosaso lagu qabtay.



**Sawir 34.** Guddoomiyaha XDXP, W/D owlaha Cadaaladda iyo Taliya Ciida mada Bo oliska DPL oo Guddoonsiiyay Shahaado Sharafeedyo Munaasabadda Maalinta Difaacayaasha Xuquuqda Haweenka. [Garowe 2020]



**Sawir 35.** Guddoomiyaha XDXP, Taliyaha Q/Boliiska G/Bari, Wakiiladda kasocda PUNSAA & W/ Haweenka DPL oo Guddoonsiiyay Suxufiyiin Shahaado Sharafeedyo Munaasabadda Maalinta Xuquuqda Aadanaha



**Sawir 36.**

Difaacaha XAP oo wareeysi gaar gaar ah la yeelanaya maxaabiista xabsiga Qardho.  
[Nofember 2020]

# QAYBTA 5-AAD

## 5.0 KORJOOGTAYNTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA AADANAHA

### 5.1 Kormeerka iyo Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha

Qaybtani waxay muujinaysaa hawlaha la qabtay, kormeeradii la sameeyey iyo natiijoyinka ugu muhiimsan ee la gaaray dhanka dhawrista xuquuqda aadanaha, helista garsoorka iyo dhaqangelinta xeerarka lagu ilaalinayo xuquuqda aadanaha;

Xafiisku wuxuu safaro ku saabsan korjoogtaynta iyo u kuurgal ku sameeyey xaaladaha xuquuqda aadanaha iyo saamaynta uu ku yeeshay COVID-19 Xabisiyada iyo saldhigyada magaalooyinka Bosaso, Gardho, Garowe iyo Galkayo isaga oo ka warbixinaya korjoogteynta iyo qiimeynta Xuquuqda Aadanaha ee ka jirta gobahaas.



**Sawir 37.** XDXAP oo ay weheliyaan xubno ka tirsan Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha W/DL ayaa gaarsiiyay agabka ka hortagga COVID-19 xabsiga Gaalkacyo.

- Kormeerro iyo korjoogtayn, ujeedadoodu tahay in xafiisku booqdo goobaha iyo xarumaha ay ka socdaan shaqooyinka Dowladda, sida saldhigyada boliiska, xabsiyada, maxkamadaha, wasaaradaha, wakaaladaha dawladda iyo goobaha shacabka ku nool yihiin, gaar ahaan xeryaha barakacayaasha iyo qaxootiyada. Kormeerada xafiiska waxaa ku weheliyey xildhibaano golaha wakiilada Puntland, xeer-ilaalinta, booliska iyo hogaanka boolisaynta bulshada.



**Sawir 38.** Difaa caha XAHA iyo xubno ka tirsan Guddiga Xuquuqda Aadanah ee Golaha Wakiiladda Puntland ayss kala hadlay Taliska xabsiga Qardho hellida xuquuqaha aadanimo ee ay leeyihiin Xukumanayaasha iyo eedaysanayaasha ku xiran xabsiga. 2020

## 5.2 Dhacdooyinka iyo Tacadiyadda ee ka dhanka ah Haweenka iyo Caruurta

- Xafiisku Wuxuu maareeyay dhammaan kiisaska tacadiga ka dhanka ah Haweenka iyo Caruurta iyadoo loo marayo hanaankan: Aqoonsiga kiisaka , diiwaan gelinta cabashada, qiimeynta baahiyaha badbaadayaasha, bixinta adeegyada sida caafimaadka, kaalmada sharciga ,ugudbinta adeeg bixiyayasha kale hadii loo baahdo, sameynta qorshayaasha dacwada iyo dabagalada kiisaska.
- Sida shaxaha hoose muujinayaan xafiiska waxaa soo gaaray sanadka 2020, 60 kiis oo ay 31 ka mid ah yihiin kufsi, 2 iskuday kufsi iyo 27 Shaqaaqo qoys ah.

### Shaxda 12. Tacadiyada iyo shaqaaqooyinka haweenka iyo carruurta 2020.

DHACDOOYINKA					NATIJADA					
Gobollada	Kufsi	Shaqaaqo qoys	Iskuday kufsi	Wadar	(Maxkamad)	Dhex dhexaadin)	Tanaasul	(Noockale)	Socda	Wadar
Nugaal	17	22	2	60	7	13	3	4	14	41
Sool	0	0	0		0	0	0	0	0	0
Gardafu	1	0	0		1	0	0	0	0	1
Mudug	0	1	0		0	1	0	0	0	1
Karkaar	5	2	0		2	2	0	0	3	7
Haylaan	1	0	0		0	1	0	0	0	1
Bari	7	2	0		4	3	0	2	0	9
<b>Wadar</b>	<b>31</b>	<b>27</b>	<b>2</b>			<b>14</b>	<b>20</b>	<b>3</b>	<b>6</b>	<b>1</b>

- Qabashada iyo ka jawaabidda cabashooyinka shacabka ayaa ah hawlaha ugu muhiimsan ee dastuurka iyo xeerka difaacaha ay u xilsaareen difaacaha. Xafiiska ayaa qaada talaabooyinka ku haboon ee baaridda, u qareemidda iyo talo bixin sharci loogana jawaabay cabashooyinka soo gaara xafiiska. Xafiisku wuxuu diwaangaliyay 129 cabasho oo badankood ka imaanayay dhammaan Gobolada Puntland. Cabashooyinkaas oo ahaa kuwa looga cabanayo garsoorka, boliiska iyo wasaaradaha adeega bixiya.

### Shaxda 13. Cabashooyinka Guud 2020

Gobol	Tiro guud	Celcelis
Nugaal	85	66%
Sool	0	0%
Guardafu	3	2%
Mudug	7	5%
Karkaar	15	12%
Sanaag	1	1%
Cayn	0	0%
Haylaan	1	1%
Bari	17	13%
<b>Wadar</b>	<b>129</b>	<b>100%</b>



**Shaxda 14. Qaabka ay xafiiska cabashooyinku u soo gaareen**

Gobol	Rag	Haween	Wadar
Nugaal	29	56	85
Sool	0	0	0
Guardafu	1	2	3
Mudug	3	4	7
Karkaar	4	11	15
Sanaag	0	1	1
Cayn	0	0	0
Haylaan	0	1	1
Bari	6	11	17
<b>Wadar</b>	<b>43 ( 33.4% )</b>	<b>86 ( 66.6% )</b>	<b>129</b>

**Shaxda 15. Natijada Kiisaska ee 2020**

Gobol	Kiisaska Maxakamaduho xukumeen	Kiisaska lagu xaliyey Dhexdhexaadin	Kiisaska Socda	Kiisaska la baabi'yey	Kiisaska Xafiisku caawiyey	Tiro guud
Nugaal	15	33	17	1	19	85
Sool	0	0	0	0	0	0
Guardafu	1	1	0	0	1	3
Mudug	2	3	1	0	1	7
Karkaar	3	6	1	0	5	15
Sanaag	0	0	0	0	1	1
Cayn	0	0	0	0	0	0
Haylaan	0	0	0	0	1	1
Bari	8	4	2	0	3	17
<b>Total</b>	<b>29</b>	<b>47</b>	<b>21</b>	<b>1</b>	<b>31</b>	<b>129</b>

**Shaxda 16. Noocyadda Xadgubyada Xuquuqda Aadanaha**

Kiisaska Tacadiyada Xuquuqda Aadanaha guud ahaan	Kiisaska Tacadiyada Jinsiga
129	60 (46.5%)

- U qareemidda dhibbanayaasha xuquuqda aadanaha goob kasta, gaar ahaan dadka ku xiran saldhigyada, dadka garmaqalka u baahan ee rumaanka ah, dadka xabsiyada ku jira ee u baahan racfaanka, dadka magdhawiyada loo haysto ee xabsiyada ku jira, dadka barakacayaasha ee ka cabanaya maqnaanshaha adeegyada asaasiga iyo amniga, suxufiyiinta laga horjoogsado inay shaqadooda si habsami leh u gutaan.

**Shaxda 17. Kormeerka xukumanyaasha iyo gar-sugayaasha ee xabsiyada ku jira 2020**

Xabsiga	Tirada Maxaabiista Guud	Tirada Xukuman	Tirada Gar-sugge	Gar-sugge Muddo-dhaafka	Maxkamada ciidanka	Maxkamadaha Caadiga ah
Bosaso	347	264	83	68	154	193
Qardho	151	95	56	27	12	139
Galkacyo	109	79	30	27	49	60
Garowe	414	302	112	84	79	335
<b>Wadar</b>	<b>1021</b>	<b>740 (72.5%)</b>	<b>281 (27.5%)</b>	<b>250</b>	<b>294</b>	<b>727</b>

**Shaxda 18. Xukumanayaasha iyo gar-sugayaasha kufsiga ee xabsiyada ku xiran 2020**

Tr.	Xabsiga	Xukumanayaasha	Gar-suge	Muddo-dhaafka Gar-suge	Faahfaahin
	Qardho	7	00	3-12 sano	31/12/2020
	Bosaso	25	2	5-12 sano	31/12/2020
	Garowe	17	6	3-12 sano (11 qof)	31/12/2020
	Galka'ayo	6	00	5-12 sano	31/12/2020
	Wadarta	55			

- Xafiisku wuxuu u qaybiyey xabsiyada iyo saldhigyada agabka ka hortagga COVID-19, sida afxir, gacmo gashi, jeermis dile, saabuun, sakeelo, iskoobayaal, daawooyin iyo jiifka (midka kala durkinta sida joodariyo, barkimooyin, go'yaal).



**Sawir 38.** XDXAP oo ku wa reejiyay xabsiyada iyo saldhigyada agabka ka hortagga COVID-19 iyo gogosha jiifka maxaabista. [Agosto 2020]

## 5.3 Maaraynta kiisaska iyo cabashooyinka

**Xafiisku wuxuu qaaday tallaabooyin uu wax kaga qabanaayo ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo helidda caddaalad loo siman yahay. Talaabooyinkaas waxaa ka mid ah:**

- Korjoogtaynta, baarista, diiwaangelinta iyo ka warbixinta tacaddiyada iyo xadgudubyada xuquuqda aadanaha
- Caawinta dhibbanayaasha xagga metelaada sharci ee maxkamadaha hortooda
- Xog ururinta iyo falaanqaynta xadgudubyada ama tacaddiyada ka dhaca deegaanada Puntland
- Xoojinta isku xirnaanta hay'adaha ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo wareejinta kiisaska.
- Tala siinta sharci xukumadda iyo laamaha caddaaladda

### 5.3.1 Ka jawaabidda adeegga Deg-degga ah

Xafiisku isaga oo kaashanaya hay'adaha bah-wadaagta ay yihiin wuxuu bixiyaa adeega jawaabta degdegga (Rapid Response). Ujeedada adeega jawaabta deg-degga ah waa adeeg loogu talagay kiisaska tacadiga ah ee ka dhaca deegaanadda fog fog, si loo ilaaliyo cadeymaha dhibanaha uuna u helo adeeg deg-deg ah si looga hortago cawaaqibka iyo khataraha ka dhalanaya falka tacadiga ah. adeegyadaas waxaa ka mid ah: Adeeg caafimaad, talo bixin maskaxeed/nafsi, adeeg sharci, adeeg taakulo nololeed. Xafiisku wuxuu kaloo fududeeya kiisaska dadka danyarta ah helidda cadaaladda maxkamadaha hortooda ( Kiis Miskiin )

### 5.3.2 Ilaalinta iyo Daryeelka Xuquuqda Caruurta iyo Da'yarta

Xafiisku wuxuu u qareemay Caruurta derbi jiif ka ah iyo kuwa qoysaska danyarta ah ee deegaannada Puntland si ay u heli lahaayeen daryeel iyo waxbarasho isagoo shirar la qaatay Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare Dawladda Puntland. Sidoo kale Xafiisku isagoo kaashanaya hay'adaha uu bahwadaagta la yahay, wuxuu fududeeyay inay dib u midoobaan 8 qoys iyo caruurtoodi oo danyar ah, oo ay markii hore kala dhumeen qoysaskoodii ee Degmooyinka Buhoodle, Xarfo, Bursaalax iyo Galdogob., isagoo ku caawiyey agabka asaasiga ah sida: agabka jiifka (furaashyo, barkimooyin, go'yaal, dhar labis ah, xasiigyo iyo mara kaneecooyin) iyo agabka waxbarashada (buugaag, qalmaan, boorsooyin, dharka iskuulka, solar iyo tooshashka wax lagu akhristo iyo kharashkii ay wax ku baran lahaayeen mudo sadex bilood ah).



**Sawir 39.** Qoyskan oo kamida ah qoysa ski Xafiisku fududeeyay inay dib-u midoobaan. [2020]

Xafiisku wuxuu u qareemay 2 caruur oo indhaha ka xanuunsan kuna noolaa xeryaha barakacayaasha magaalada Gaalkacyo, uuna ka caawiyey kharash ay ku imaan lahaayeen dhakhtarka indhaha magaalada Garowe, halkaas oo daawayn loogu sameeyey.

## 5.4 Kor-u-qaadidda dhawrista Xuquuqda Aadanaha iyadoo loo marayo Maamulka iyo Adeegyada Caddaaladda

Xafiisku isagoo la kaashanaya laamaha caddaaladda, xeer-dejinta iyo ururada bulshada, wuxuu halkaan ku muujinayaa hawlaha la qabtay iyo natiijoyinka ugu muhiimsan ee laga gaaray dhanka dhawrista xuquuqda aadanaha, helidda garsoorka iyo dhaqangelinta xeerarka lagu ilaalinayo xuquuqda aadanaha sanadka 2020:-

- Xafiisku wuxuu kormeer iyo qiimayn ku sameeyey meelaha u nugul inay ka dhacaan xadgudubyadu, sida; saldhigyada boliiska, xabsiyada, maxkamadaha, xarumaha dadka soo barakacay, qaxootiyada, meelaha lagu hayo dadka baahiyaha gaarka ah qaba.
- Xafiisku wuxuu diiwaangeliyey dhacdooyinka, xadgudubyada/tacaddiyada iyo gaboood-falladada ka dhacay Puntland. Waxaa si gaar ah xafiisku isaga xil-saaray qaabkii xog looga heli lahaa tacaddiyada ku dhaca barakacayaasha, haweenka, carruurta, dadka baahiyaha gaarka ah qaba, suxufiyiinta, siyaasiinta iyo xubnaha kale ee u ololeeya xuquuqda iyo arrimaha bulshada.
- Xafiisku wuxuu qabtay, kana jawaabay 129 cabasho, iyadoo la raacayo hawlaha habraacyada, dastuurka iyo xeerka difaacaha ay u xilsaareen Xafiiska Difaacaha oo kala ah 86 haween iyo 43 rag. Xafiisku wuxuu sameeyey baaris, u qareemid iyo tala bixin looga jawaabayo cabashooyinka soo gaaray. Waxaa la xalliyey 108, halka ay 21 cabasho hawshoodu socoto.



- Xafiisku wuxuu wax ka qabtay u qareemay dhibanayaasha xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee ku nool degmooyinka iyo deegaamada Puntland, gaar ahaan dadka ku xiran saldhigyada boliiska, dadka garmaqalka u baahan ee rumaanka ah, dadka xabsiyada ku jira ee u baahan racfaanka, kuwa mudda-dhaaf xabsiga ku jira oo magdhaw loo haysto ee aan iska bixin karin, dadka barakacayaasha iyo dadka baahiyaha gaarka ah oo ka cabanaya maqnaanshaha adeegyada aasaasiga ah. Dhibbanayaasha ku nool meelaha ka fog laamiga ee aan lahayn waddooyinka iyo adeegyada kale ee aasaasiga ayaa xafiisku ku dadaalay siddii loogu qareemi lahaa.
- Xafiisku wuxuu ka qayb-qaatay u ololeynta hirgelinta xeerarka iyo shuruucda si dhibbanayaashu caddaalad u helaan, kuwa xadgudubka sameeyeyna sharciga loo hor geeyo. Xafiisku wuxuu bixiyey adeegga jawaab-celinta degdegga ah (rapid response) oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka, la talinta ama caqli-celinta, u qareemidda sharci ee dadka danyarta oo aan awoodin inay qareen qabsadaan.

## 5.5 U Qareemidda Dhibbanayaasha Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha

- Xafiisku wuxuu ka qaybqaatay u qareemidda siidaynta 94 maxbuus oo ku xirnaa xabsiyada Puntland.
- Wuxuu kaloo xafiisku u qareemay dhibbanayaasha xuquuqda aadanaha, gaar ahaan dadka ku xiran saldhigyada iyo xabsiyada, sida maxaabiista ( gar-sugaha ah, rafcaanlaha, iyo kuwa magdhawiyada loo haysto) iyo dadka barakacayaasha ee ka cabanaya maqnaanshaha adeegyada asaasiga iyo amniga, suxufiyiinta laga horjoogsado inay shaqadooda si habsami leh u gutaan.
- Xafiisku isaga oo kaashanaya hay'adaha bah-wadaagta ay yihiin wuxuu bixiyaa adeega jawaabta degdegga (Rapid Response) oo ay ku jiraan adeegyada caafimaad, talo bixin maskaxeed/nafsi iyo fududeynta warqadda dhaawac muujinta iyo u qareemidda diiwangelinta kiisaska danyarta maxkamadda.

## 5.6 Kormeeradda iyo Qiimaynta Meelaha u Nugul Xadgudubyada

- **Kormeerka Xarumaha Garsoorka:** Xafiisku wuxuu kormeer ku sameeyey xarumaha garsoorka ee caadiga ah iyo ciidamada iyo agabkooda. Xafiisku wuxuu booqday xarumaha garsoorka degmooyinka Bosaso, Garoowe , Galkacayo, Badhan, Bargaal, Xarfo, Dhahar iyo Qardho. Maxkamadaha gobolada Bari iyo Mudug ayaa ku yaala goobo suuq ah oo ay adag tahay in amnigooda la sugo.



**Sawir 40.** Difaacaha Xuquuqda Aa danah oo kulan la yeeshay Guddoomiyaha, Xeer Ilaaliyaha iyo Garsoorayaa sha Maxkamadaha Sare ee Ciidamada Qalabka sida Xaruntooda Garowe. [Sebtember 2020]



**Sawir 41.** Difaacaha Xu quuqda Aadanaha oo ay wehe liyaan Guddiga Xuquuqda Aadanah Puntland ayaa kulan la yeeshay Garsoorayaasha Maxkamadaha Caadiga ah ee Gobolka Mu dug. [Oktober 2020]



**Sawir 42.** Difaa caha Xuquuqda Aa danah oo kulan la yeeshay Garsoorayaasha Maxkamadaha Caadiga ah ee Gobolka Karkaar. [Oktober 2020]



- Kormeerka Xabsiyada iyo saldhigyada boliiska:** Puntland waxay leedahay Afar (4) xabsi oo ku kala yaal magaalooyinka Garowe, Bosaso, Galkacyo, Qardho iyo xabsiga Badhan oo haatan qabyo ah, kuwaas oo bixiya adeegyada aasaasiga ah ee xabsiyada looga baahan yahay. Xafiisku wuxuu kormeer iyo u kuurgelid ku sameeyey afarta xabsi (Boosaaso, Qardho, Garoowe iyo Galkacyo) iyo 23 saldhig boliis oo ku kala yaal gobolada iyo degmooyinka Puntland. Tirada guud ee maxaabiista ku xiran afarta xabsi waxay ahaayeen 1,021 maxbuus. Waxaa haween ah 25 (14 xukumane iyo 11 garsuge), ragguna waa 996 (726 waa xukumane iyo 270 waa garsuge). Celcelis ahaan, tirada guud ee maxaabiista ku xiran afarta xabsi ayaa ah kuwa ka badan intii loogu talo galay ee loo qoondeeyey; gaar ahaan xabsiyada Garowe iyo Gaalkacyo. Waxaa muhiim ah in la isu dheelitiro adeegyada, kaabayaasha iyo agabka kale ee xabsiga iyo tirada maxaabiista ee ku jirta si loo helo tirada saxda ah oo loogu talagalay in lagu xiro xabsiga.

**Shaxda 19. Kormeerka Saldhigyadda**

No.	Goobta Saldhiga	Taariikhda	Degmada	Tirada Maxaabiista	Lab	Dhedig	Carruur	Naaf	Ajaanib	Wadar
1	Biyo-Kulule	Sept/2019	Bosaso	63	54	9	2	0	2	63
2	Saldhiga Dhexe	sept/2020	Qardho	34	33	1	4	1	0	34
3	Saldhiga Dhexe	28/2/2019	Garoowe	48	43	5	2	0	1	48
4	Saldhiga Dhexe	sept/2020	Gaalkacyo	67	64	3	0	0	0	67
5	Saldhiga Dhexe	sept/2020	Boocame	4	3	1	0	0	0	4
6	Saldhiga Dhexe	2/1/2019	Badhan	9	8	1	0	0	0	8
7	Saldhiga Xarfo	24/1/2019	Xarfo	18	12	6	0	0	0	18
8	Saldhiga Galdogob	30/9/2019	Goldogob	50	45	5	0	0	0	50
9	Saldhiga Gabaldaye	Sept 2020	Dangorayo	2	1	1	0	0	0	2

10	Saldhiga Shirwac	Sept 2020	Carmo	90	60	30	0	0	0	90
11	Saldhiga Dhexe	Sept 2020	Badarbayla	11	11	10	1	0	0	11
12	Saldhiga Waaciye	Sept 2020	Waaciye	9	6	3	1	0	0	9
13	Saldhiga Dhexe	sept/2020	Bosaso	80	73	7	0	0	0	80
14	Saldhiga Saaxo	sept/2020	Saaxo	2	1	1	0	0	0	2
15	Saldhiga Tawfiq	2/9/2019	Towfiq	0	0	0	0	0	0	0
16	Saldhiga Miir	Sept 2020	Gaalkacyo	39	39	0	0	0	0	39
17	Saldhiga galbeed	Sept 2020	Garoowe	7	7	0	0	0	0	7
18	Saldhiga Minjir	Sept 2019	Bosaso	33	29	4	0	2	0	29



**Sawir 43.**

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha oo ay weheliyaan Howl-wadeenada Xafiiska iyo xubno ka tirsan Guddiga Boolisaynta Bulshadda oo Kormeeray Saldhiga Ga Ibeed ee Garoowe. [Disember 2020]



**Sawir 44.** Difaacaha Xuquuqda Aadanaha iyo Taliyaha xabsiga dhexe ee Gaalkacyo oo si gaar ah uga wada ha dlaya xaaladda guud ee xabsiga iyo xuquuqda maxaabista. [Disember 2020]

● **Kormeerka Xaalada Barakacayaasha:** Xafiisku wuxuu kormeer joogto ah ku sameeyey xeryaha barakacayaasha oo ay ku nool yihiin dad tiro badan ee degmooyinka Boosaaso, Qardho, Garoowe, Gaalkacyo, Xarfo, Boocame, Taleex, Godob-jiiraan. Dangorayo, Waaciye, Carmo, Badhan, Dhahar, Iskushuban, Baargaal iyo Xaafuun. Barakacayaashu waxay ka kooban yihiin dad koonfurta soomaliya ka yimid, kuwa xoolo dhaqato ahaa oo abaarihii isdaba joogga ahaa xoolahoodii ku waayey dabadeedna tuulooyinka iyo miyiga ka soo barakacay, iyo kuwo ay saameeyeen dagaaladda maamulada dhexdooda (Mudug, Sool, Cayn, Haylaand iyo sanaag) iyo alshabaab/daacish. Xafiisku wuxuu kormeero isdaba joog ah ku sameeyey xeryaha barakacayaasha ee ku yaal boosaaso, gaalkacyo, qardho, kormeeradaas iyo korjoogtaynta waxaa ka soo baxay:-

- Xeryaha la kormeeray 70% ma haystaan adeegyada aasaasiga sida; hoy, biyo, caafimaad, waxbarasho iyo cunto. Intaas waxaa dheer heerka fayadhawrka iyo nadaafadda wuxuu marayaa meel xasaasi ah iyadoo lagu jiro xilliga cudurka COVID-19, lagana baqayo in aad u faafo.
- Caqabaddaha ugu weyn ee dadka barakacayaasha haysata waa dhul la'aan. Dhulalka dadkaas ay deggan yihiin waa dhul si gaara dad shacab ah u leeyihiin, kuwaas oo bulshada kula heshiia waqti dhawr sano ka dib inay uga baxaan.



**Sawir 45.** Kormeer shaqo oo ay ku tageen Howl-wadeenadda XDXAP Xeryaha Barakacayaasha Bosaso. [Disember 2020]

- **Kormeerka Dadka Baahiyaha Gaar ah leh:** Xafiisku wuxuu kormeer ku sameeyey xarumaha dadka dhegaha naafada ka ah, indhaha iyo qaybaha kale jirka. Ujeeddada kormeerada iyo qiimaynta waxay ahayd in loo kuurgalo xaaladaha xuquuqda aadanaha iyo saamaynta cudurka COVID 19 ku yeeshay nolosha dadka baahiyaha gaarka ah leh. Meelaha xafiisku kormeer qiimayn ah ku tegey waxaa ka mid ah xafiiska guddoomiyaha dadka naafada ah, iskuulada dadka maqalka naafada ka ah ee ku kala yaal Buhoodle, Qardho, Garowe, Boosaaso, Galkacyo iyo Badhan, iyo iskuulka dadka arragga naafada ka ah ee Garoowe ku yaal.
- **Waxyaabihii ka soo baxay kormeerada qiimaynta waxaa ka mid ahaa:-**
  - Dadka baahiyaha gaarka ah qaba kuma baraarugsana xuquuqahooda dastuuriga ah
  - Dadkaasi uma helaan adeegyada aasaasiga si la siman dadka kale, loomana tixgeliyo duruufahooda
  - Macalimiinta iyo dadka ka u shaqeeya dadka baahiyaha gaarka qaba ma helaan agabka lagama maarmaanka u ah
  - Haweenka iyo carruurta baahiyaha gaarka ah qaba waa uga sii nugul yihiin tacaddiyada ragga baahiyaha gaarka ah qaba.
  - Xafiisku wuxuu kormeer ku sameeyay xarumaha ay wax ku bartaan caruurta maqalka naafada ka ah ee Gobolka Karkaar Degamda Qardho isagoo u kuur-galayay xuquuqdooda aasaasiga ah sida: waxbarashadda, caafimaadka iyo hoyga.
  - Howl-wadeenadda xafiiska xuquuqda aadanah oo booqasho kormeer ku tagay xarunta wax lagu baro dadka naafadda/baahiyaha gaarka ah ee gobolka mudug degmadda Gaalkacyo



Sawir 46.

Saraakiil ka tirsan XDXAP oo u kuur galaya Xaaladda Xuquuqda Aadanaha iyo Adeegyadda Aasaasiga ah ee Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba sida Caafimaadka, Wabarashadda iyo nolosha ee Degmooyinka Buhoodle, Qardho, Garowe, Boosaaso, Galkacyo iyo Baran. [2020]



**Sawir 47.** Howl-wadeeno ka tirsan XDXAP oo ku booqday Xarunta Guddiga Naafadda Gobolka Mudug ee Gaalkacyo, kuwaas oo ka cabanaya Daryeel xumo ka jirta adeegyada Waxbarashadda iyo Noloshu Aasaasiga. [2020]

- **Kormeerka Dadka dhimirka ka xanuunsan iyo carruurta aan la daryeelin:** Xafiisku wuxuu kormeer iyo xog ururin ku sameeyey dadka dhimirka ka xanuunsan iyo goobaha lagu xanaaneeyo dadkaas. Goobaha xafiisku booqday waxaa ka mid ah Boosaaso, Qardho iyo Garoowe oo ay ka jirto dhibaatooyin haysta dadka dhimirka ka xanuusan. Mas'uuliyadaha dawladda ee ku aaddan daryeelka dadka dhimirka ka xanuusan oo aan la siin mudnaanta ay xaqqa u leeyihiin sida ku cad dastuurka DPL **Qodobka: 34aad** (Farqadaha: 1aad iyo 2aad)

## 5.7 Xoojinta dhaqangelinta xeerarka iyo heerbeegyada ilaalinta Xuquuqda Aadanaha

- Xafiisku wuxuu xoojiyay kor-joogtaynta hab-raacayada sharci iyo hellida caddaaladda si loo hubiyo fulinta iyo u hogaansanaanta heer beegyada xuquuqda aadanaha.
- Xafiiska Difaacaha Xuquuqda aadanaha oo dadaal ka sameeyay ka qayb galka hindise-sharciyeedyada iyo siyaasadaha hay'adaha dawladu diyaariyaan ee la xiriira xuquuqda aadanaha iyo xorriyaadka aasaasiga ee dadka ku nool Puntland, sida: xeerka dowladaha hoose, xeerka doorashooyinka, xeerka codbixiyaha iyo xeerarka kale ee khuseeya ilaalinta iyo hirgelinta xuquuqda aadanaha. Xafiisku wuxuu dhiirigeliyey dhaqangelinta heshiisyada iyo lifaaqyada ka qaybgalka siyaasadda ee haweenka heer Puntland iyo heer Federaal. Haseyeeshee, waxaa jira caqabado arimahaan weli ka taagan.
- Muddo warbixineedka 2020 ka, XDXAP wuxuu xoogga saaray hubinta in la fuliyay xeerarka iyo siyaasadaha la xiriira xuquuqda aadanaha, taasoo loogu kuur galay howl-fulinta Boliiska, Maxkamadaha, Xeer-ilaalinta, W/Caddaaladda iyo Qareenada madaxa bannaan.
- Xafiisku wuxuu talooyin sharci siiyay Hay'adaha sare ku xusan, islamarkaasna kor-joogteyay falcelinta iyo gol-daloolooyinka ka soo baxay talo-bixinta sharci ee xafiisku horay u soo jeediyay.



### Natiijooyinki ka soo baxay falcelinta iyo talo bixinta xafiiska waxaa ka mid ah:-

- **Boliiska:** in kastoo boliiska lagu sameeyay dib-u habeyn ciidan iyo tira-koob lana siiyay tababaro la xiriiira xir-fadohooda, haddana waxaa wali jira caqabdo taagan oo ay ka mid yihiin hab dhaqanka sharci ee boliiska iyo bulshada, xarrig aan loo marin hab sharci ah, diwaangelinta Buugga Dhacadooyinka ( OB ), dadka ku xiran saldhigyada oo aan muddada sharcigu ogol yahay lagu horgeyn maxkamadaha ( 48 Saac gudahood ), daahinta baarista iyo gungaarka kiisaska boliisku gacanta ku hayo, ogolaanshaha boliiska in kiisaska ciqaabta ah ( kufsiga ) dib loola noqdo oo odayaasha/culimadu maxkamadda dibadeeda ku dhameystaan. Ku dhaqan la'aanta boliiska nidaamka iyo habraacyada sharci ee xuquuqda aadanaha waxay welwel ku abuurtay guud ahaan bulshada gaar ahaan dhibbanayaasha.
- **Garsoorka:** Xafiiska waxaa soo gaaray cabashooyin badan oo ku saabsan xadgudubyadda xuquuqda aadanaha iyo helidda caddaaladda. Maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta waxay mas'uul ka yihiin fulinta xeerarka, meel-marinta xukunadda iyo dabakhaadda sharciga dalka u degsan. Arrimaha ku saabsan dacwadaha ciqaabta ah oo aan loo marin habraacyada baarista dambiyada oo ay ka timaado daahitaanada baarista iyo gungaarka dacwadaha iyo dhagaysiga gar-maqallada. Hanaanka cadaaladeed iyo go'aannada ka soo baxa maxkamadaha oo ay ka jiraan caqabado sababay in ay adkaato fulinta go'aannada ay maxkamaduhu gaaraan.
- **Wasaaradda Cadaallada:** doorka ay ku leedahay daboolidda baahiyaha Xabsiyada iyo Maxaabiiska oo ay ka jirto gaabis iyo cabasho helidda adeegyadda aasaasiga ah. Asaasiyaadkaa waxaa ka mid ah:-
  - Adeegga daryeelka caafimaadka, waxbarashada, biyo nadiif ah, quudinta, iyo gogosha oo aad u liita.
  - Sidoo kale dhismaha iyo qololka xabsiyada oo ay qeybtood ku xiran yihiin tiro ka badan intii loo qondeeyey in lagu xiro. Dhismaha xabsiga Galkacyo oo u baahan dayactir iyo fidinta dhismaha xabsiga.
  - Waxaa kaloo ciriiri ka jiraa qoono miisaaniyadeedka xabsiyada taas oo aan dabooli karin nolosha maxaabiista.
- **Qareennada Madaxa-bannaan:** waxaa mas'uuliyad ka saaran tahay Ilaalinta iyo u gar-gaaridda sharciga guud ahaan iyo ku shaqaysiga xir-fadda ay ugu adeegayaan macaamiishooda. Haddaba, waxaa xafiiska soo gaaray dad badan oo cabashooyin wata, markii xafiisku baaray cabashooyinkaas wuxuu ogaaday in dadka cabanaya ay leeyihiin qareenno madax-banaan, laakiin gol-daloolooyin ka jira shaqada qareennada iyo hawl-socodsiiinta garsoorka awgeed waxay keentay in go'aan gaarista iyo habsami u socodka dacwadaha muddo dheer lagu daahiyo maxkamadaha, taasoo keentay in dadku ay ka niyad jabaan hellida caddaaladda iyo kalsoonida qareenada.

# QAYBTA 6-AAD

## 6.0 CAQABADAHA IYO TALOONYINKA

### 6.1 Caqabadaha jira

- Habraaca helidda adeegga caddaaladda iyo isla xisaabtanka oo hooseeya, tayada garsoorka iyo go'aan ka gaarista dacwadaha oo daaha, taas oo wiiqday kalsoonida bulshadu ay ku qabto laamaha caddaaladda, waxayna sababtay in bulshadu cabashooyinkooda la aadaan xeer dhaqameedka (customary law).
- Adeegyada aasaasiga ee hay'adaha dawladdu bixiyaan oo aan bulshada si siman u gaarin, gaar ahaan meelaha laamiga ka fog.
- Arrimaha xasaasiyada keenay sicir bararka iyo faragelinta xukuumadda ee dhaqaalaha gaar ahaan lacagta Shillin Soomaali iyo doolarka.
- Xadgudubyada ugu badan waxay ku dhacaan haweenka iyo carruurta, haweenkuna aad ayey ugu yar yihiin ciidamada amniga iyo laamaha caddaaladda, taasina waxay sababtay in dhibbanayaasha haweenka ah aanay u dacwoon karin, dhibtoodana u sheegan karin laamaha caddaaladda.
- Daahfurnaanta hanaanka doorashooyinka golayaasha deegaanka ee dawladdaha hoose oo cabashooyin ka taagan yihiin meelaha qaarkood. Hanaanka awood-qaybsiga beelaha wuxuu duudsinayaa kaalintii haweenka, dadka la hayb-sooco iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba. Hanaanka doorashooyinka ku dhisan qabiilaysiga wuxuu kala dhantaalayaal qiyamka sinaanta, caddaaladda iyo mutaysiga. Taasina waxay hoos u dhigaysaa sharciyadda iyo tayada hogaaminta bulshada.
- Xabsiyada oo ay ku soo bateen dadka dhimirka ka xanuunsan iyo dadka cudurada faafa qaba, taas oo khatar gelisa nolosha maxaabiista, ilaalada xabsiyada iyo dadweynaha.
- Dadka baahiyaha gaarka ah qaba oo aan helin adeegyada aasaasiga ah ee ay dadka kale helaan, sida; adeegyada caafimaadka, waxbarashada, shaqooyinka iyo ka qaybgalka horumarka iyo siyaasadda.
- Waxaa jira cabashooyin ka imaanaya bulshada danyarta ah, kuna saabsan furashada gal-dacwadeedka oo aysan awoodin dad badan oo Maxkamadaha dacwad keensada. Qaadista lacagtaasi waxay caqabad ku noqotaa bilaabashada dacwadaha, Waxayna niyad jab ku riday dad badan oo Xaq dastuuri ah u leh inay Garsoor helaan kuwaasi oo ugu dambaynta ka niyad jaba Habsami u socodka Caddaaladda.



- Waxay cabashooyin ka yimaadaan xaashida dhakhtarka ee dhaawac muujinta boliisku bixiyo taas oo dadka lagu weydiyo lacago aan sharciga waafaqsanayn.
- Waxaa kaloo cabashooyin ka jiraan baarayaasha boliiska oo ku daahiya dhibbanayaasha gungaarka dacwadaha si ay dhaqaale uga helaan.
- Boliiska iyo xabsiyada qaybtood oo ka cabanaya agab la'aan iyo dhismayaasha qaybtood oo burbursan
- Xanuunka Karoona oo Saamayn taban ku yeeshay xaalada nolosha iyo adeegyada bulshada Waxaa cabashooyin ka jiraan hay'ada sirdoonka iyo nabad-sugidda Puntland oo sifo aan sharciga waafaqsanayn ugu geysata xarig, isla markaasna ku xirata goobo aan sharci ahayn.
- Cabashooyin ka imaanaya dadweynaha oo ku saabsan habdhaqanka laamaha amniga, gaar ahaan boliiska iyo ilaalada gaarka ah ee madaxda.
- Waxaa sii kordhaaya cabashooyinka la xiriira xorriyada hadalka/fikirka ay wajahayaan suxufiyiinta, siyaasiinta iyo qaybaha bulshada oo la kulma hanjabaad iyo xarig aan loo marin sifo sharci
- Guud ahaan xabsiyada Puntland waxaa hooseeya adeegyada aasaasiga, sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, cuntada iyo dhismayaasha qaarkood oo aan lahayn qolal ku filan maxaabiista

## 6.2 Talooyinka

- In kor loo qaado xirfadaha iyo aqoonta laamaha caddaaladda, dibu eegisna lagu sameeyo dhismaha garsoorka si loo tayeeyo garsoorka iyadoo la xaqiijinayo in la helo garsoor caddaalad ah oo madaxbanaan, bulshaduna ku kalsoonaan karto.
- In Xukuumaddu dib u eegis ku samayso qaybinta khayraadka iyo adeegyada (equitable service delivery), waana in la kabo meelaha dibu dhacsan si laysula jaanqaado.
- In dawladdu ay xal degdeg ah ka gaarto arrimaha sicir bararka iyo dhaqaale burburka ku socda shacabka Puntland
- In haween aqoon iyo karti leh lagu daro ciidamada boliiska iyo laamaha caddaaladda si haweenku qayb uga noqdaan hagaajinta adeegga amniga iyo helidda caddaalad loo siman yahay.
- Hanaanka doorashooyinka waa in lagu saleeyo mutaysi iyo daahfurnaan, lana xaqiijiyo kawada qaybgal siyaasadeed oo ay ka muuqato sinaan iyo caddaalad. Waana in la suurta geliyo jawi saamixi kara in haweenka, dhalinyarada, dadka baahiyaha gaarka ah qaba, barakacayaasha iyo dadka la hayb-sooco ay u tartami karaan doorashooyinka iyo diyaarinta goob doorasho oo cod-bixin daahfuran leh.



- In dadka dhimirka ka xanuunsan, curyaamada, carruurta agoomaha ah, dadka gaboobay iyo dadka cudurada faafa qaba loo helo xarumo lagu daryeelo oo gaar ah, loona sameeyo xeer lagu dhaqayo dadka aan is-daryeeli karin, sida ku cad dastuurka Dawladda Puntland **Qodobka 34aad.**
- In la sameeyo siyaasad fursado loogu abuurayo dadka baahiyaha gaarka ah qaba si ay u helaan adeegyo ay ku xallin karaan baahiyooda gaarka ah.
- Laamaha amniga waa inay dhawraan sharciga, isla markaana ku dhaqmaan nidaamka iyo habraacyada waafaqsan sharciga oo lagu ilaalinayo xuquuqaha aasaasiga ah ee muwaadinka.
- Xukuumaddu waa inay ilaalisaa xaqa saxaafadda iyo warbaahinta xorta/madaxbanaan, sida ku cad Dastuurka Puntland **Qodobka 22aad.**
- In Baaritaan xilliyeysan lagu sameeyo saamaynta caabuqa safmarka ah ee Korona goobaha u nugul faafitaanka cudurka sida xabsiyada, saldhigyada, barakacayaasha iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba si loo joogteeyo ka hortagga iyo la tacaalidda cudurka.
- Guud ahaan, waa in dawladdu dib u eegto adeegyada aasaasiga ah ee xabsiyada, sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, cuntada iyo dayactirka dhismayaasha, gaar ahaan xabsiga Gaalkacyo, laysuna dheelitiro tirada maxaabiista ee ku jirta xabsiyada si loo helo tirada saxda ah oo loogu talagalay in lagu xiro xabsi kasta





Ilaalinta & Dhowrista Xuquuqda

# AADANAHA

Xarumaha Xafiiska ee Gobollada Puntland

Mudug

Bari

Nugal HQ

Sanaag

Cayn

Sool

Gardafuu

Haylaan

Karkaar



*Wixii cabasho ah la soo xiriir  
lamabarka wicidda deg-degga ah*

323



[Ophrd.pl.so](http://Ophrd.pl.so)



[OPHRD14](https://www.facebook.com/OPHRD14)



[Chairman@ophrd.org](mailto:Chairman@ophrd.org)